- Soomaali baan ahay.

Soomaaliyaa = Soomaali

Soomaaliyaan = Soomaali
baan ahay

39.2

- Adigu Sawaaxiliga ma jeceshahay?
- Haa. Waan jeclahay.
- Ma Xabashiyaa tahay?
- Haa, Xabashiyaan ahay.

Xabashiyaa = Xabashi baa
Xabashiyaan = Xabashi baan

39.3

- Iska warran.
- Nabad.
- Ma magaalay ku nool yihiin aabbahaa iyo
hooyadaa?
- Haa, Berberay ku nool yihiin.

Berberay = Berbera ayaa ay

Beginning in Somali (1966: 100–103)

Cutubka 9aad

9.1 Ciiddul-Adxa

Maanta waa Ciiddul-Adxa. Faadumo
iyo Xasan waa ay faraxsan yihiiin.



Ugu horrayntii waa ay qubaysanayaan.

Marka xigta waa ay weysaysanayaan.



Dabadeed waxa ay gashanayaan
dharkooda cusub.

Faadumo waxa ay haysataa
cambuur iyo masar.

Xasan waxa uu haystaa
khamiis cad iyo koofi cusub.

ciíd -da (Ar.) *holiday, festival, eid | eid, helg, högtid*
Ciíddul-Ádxa *Feast of the Sacrifice | Offerhögtiden*
faraxsán (adj.) (Ar.) *happy | glad, lycklig*
yihiiin *they are | de är*

ugú (superlative particle) *the most, of all | mest, av alla/allt*
ugu horraýntii *first of all | (allra) först*

qubaysánayaa (intrans., progr.) *is taking a bath, is taking a shower | duschar, badar (sig själv)*
weysaysánayaa (progr.) *washes oneself before prayer | tvättar sig inför bön*

dábo -da *rear, butt, tail | stjärt, svans, bakdel*
dabádeed *then, afterwards sedan*
gashánayaa (progr.) *puts on, dresses in | tar på sig*
cusúb (adj.) *new | ny*
másar -ka (Ar.) *handkerchief, head scarf | näsduk, huvudduk*
khamiis -ka (Ar.) *long shirt | långskjorta*
cad (adj.) *white | vit*
koofí -da *hat, cap | hatt, mössa*



Dabadeed waxa ay carruurtu
aabbahood iyo hooyadood
u raacayaan masaajidka.

carruúr -ta (coll.) *children* | (flera)
barn
raácayaa (progr.) *accompanies*,
wlaks with | *går med, följer med*
masaájid -ka (Ar.) *mosque* | *moské*



Carruurtu marka ay masaajidka
ka soo noqdaan waxa ay cunayaan
buskud iyo xalwo.

soó noqdaa, noqotaa *returns* |
återvänder
búskud -ka (mass.) (Eng. biscuit)
biscuits | *kex, (små)kakor*
xálwo -da (Ar.) *halwa* (Somali
confection, see [receive at
Xawaash.com](#)) *halva* (somalisk
konfektyr)



Dabadeed carruurta aabbahood
waxa uu biraynayaa ri'.

biraýnayaa, biraýnaysaa (progr.)
is slaughtering | *slaktar*
ri', def. **rída** *goat* | *get*



Hooyaduna deriska ayaa ay siinaysaa hilib.

dérís -ka neighbour | granne
hílib -ka meat | kött




Dabadeed qoysku waxa uu cunayaa qado hilib badan leh.

qádo -da lunch | lunch
léh (reduced verb form) having,
that has, which has | som har

Qof waliba waa faraxsan yahay.

Markii ay casar tukadaan carruurtu waxa ay akhrinayaan Qur'aanka.

márkii (introduces a subclause)
when | när
cásar -ka (Ar.) afternoon, afternoon
prayer | eftermiddag, eftermid-
dagsbönn
tukadaa, tukataa prays | ber
Qur'áan -ka (Ar.) Quran |
Koranen



Markii Qur'aanka akhriskiisu uu dhammaado carruurtu waxa ay aadayaan guriga adeerkood.

dhammaadaa, dhammaataa ends,
finishes | slutar, tar slut
adeér -ka uncle (paternal) | farbror



Dabadeed carruurta adeerkood
waxa uu siinayaa lacag.

9.2 Ka jawaab su'aalahan

1. Maxaa uu ahaa dharka cusub ee
Faadumo loo iibiyay?
2. Maxaa uu ahaa dharka cusub ee
Xasan loo iibiyay?
3. Qoysku xaggee buu aaday ugu
horreyntii?
4. Yaa bireeyay ri'dii?
5. Yaa ay siisay hooyo hilibkii?
6. Maxaa ay u samaysay sidaas?
7. Faadumo iyo Xasan adeerkood
muxuu siiyay?
8. Sheeg magacyada laba ciidood oo
Islaamku leeyahay.

maxáa (focused pronoun) *what? + focus | vad? + fokus*
ahaa *he was, it was, I was | var*

búu = báa uu *focus + he | fokus + han*


yáa (focused pronoun) *who? + focus | vem? + fokus*

muxúu = maxáa uu *what + focus + he | vad? + fokus ... han*

isláam -ka *islam | islam*

9.3 Isticmaalka biyaha

Biyaha waxa aynu ka soo dhaansannaa
ilaha biyaha, ka dibna waxa aynu
keennaa guryaheenna.
Halkee baa aad biyaha ku
kaydsataan?



Kani waa sawir jalxad dul taalla miis
yar.

Sidee baa aad biyaha ku kaydsataa
guriga?

Sidee baa aad biyaha guriga nadiif
ugu kaydsataa?

Sidee baa aad jidhkaaga u nadiifisa?

Sidee baa aad gurigiinna u nadiifisa?

Islaamku maxaa uu ka qabaa
nadaafadda?

jalxád -da clay jar, water vessel |
(ler)krus, kanna
dúl -sha surface, on top of |
ovansida; ovanpå
yaallaa, taallaa lies, is situated, is |
ligger, finns, befinner sig

ká qabaa has an opinion, thinks
something about something |
anser ngt om ngt

9.4 Isticmaalka dabka


Waxa aynu u baahan nahay dab.

dab -ka fire | eld

Maxaa aynu dabka ugu baahan nahay?

Eeg sawirradan.

Maxaa aan dabka u isticmaalnaa?



Dabka waxa aan ku karsanna
cuntada.


kú (prep.) in, on; with (a tool): due to (something) | i, på; med (hjälp av), på grund av

karsadaa, karsataa cooks (for oneself) | lagar mat (åt sig själv)



Dabka waa aynu kulaalnaa.

kulaalaa, kulaashaa warms oneself up | sitter nära ngt för att värma sig



Dabka waxa inagaga baqda dugaagga.

Qor labo waxtar oo kale oo uu dabku leeyahay.

inagagá < ina + ku + ka (obl.
contr.) *us ... in/on ... from | oss
... i/på ... från*

baqdaa, baqataa *is scared off, flees,
runs away | skräms bort*

dugáag -ga (coll.) *wild animals |
vilda djur*


waxtar -ka *use, usefulness, benefit,
advantage | nytta, användning*

9.5 Isticmaalka dharka

Waxa aynu u baahan nahay dhar.

Dharka kama maaranno.

Waxa aynu xidhanna dhar kala
duwan xilliyo kala duwan.



kalá apart, away from each other |
isär, åt olika håll, från varann

xidhaa, xidhataa / xirtaa, xirataa
puts on, dresses in | tar på sig,
kläär sig

xílli -ga season (of the year), period
| tid, period, årstid

Kani waa Rooble.

Waxa uu tagayaa masaajidka
maalinta Jimcaha.

Maxaa uu Rooble xidhan yahay?



maalín -ta day | dag
Jímce -ha (Ar.) Friday | fredag

xidhán / xirán (adj.) dressed (in) |
klädd, påklädd

Kuwani waa Xasan iyo Hibo.

Waxa ay tagayaan dugsiga.

Maxaa ay iyagu xidhan yihiin?


iyágá (long pron.) they | de

Waa maxay dharka aad dugsiga u
xidhataa?

Waa maxay dharka aad ciyaaraha u
xidhataa?

Dhar kala duwan baa aynu xidhanna
xilliyada kala duwan.

ciyaár -ta *play, game, sport lek, spel*



Marka ay xilli kulul tahay waxa aynu
xidhanna dhar fudud.


kulúl (adj.) *warm | varm*

Kani waa Geeddi aabbihiis.

fudúd (adj.) *light, easy, simple |
lätt*

Waxa uu xidhan yahay dhar fudud
waayo waa xilli kulul.

waáyo *because, since | eftersom,
därför att*



Marka ay xilli qabow tahay waxa aynu
xidhanna dhar kulul.

qábow -ga coldness | kyla
qabow (adj.) cold | kall

Kuwani waa Maxamed iyo Xasan.

Waxa ay xidhan yihiin dhar kulul
waayo waa xilli qabow.

Qor labo waxtar oo kale oo uu dharku
leeyahay.

Cilmiga bulshada, Fasalka 1aad. Hargeysa 2001: 47-50.

Wadahadallo 40-41

40.0

- Immisa carruur ah baa walaalo tiiin?
- Waxaannu walaalo nahay laba hablood iyo shan inan.

40.1

- Xaggeed ka timid?
- Waxaan ka imid Afgooye.
- Ma Afgooyaad ku dhalatay?
- Maya, Baraawaan ku dhashay.
- Immisa carruur ah ayaad walaalo tiiin?
- Waxaannu walaalo nahay toddoba carruur ah.

xaggeed = xaggee ayaa aad
Afgooyaad = Afgooye ayaa aad

Baraawaan = Baraawe ayaa aan
Baraawe Barawa, Brava | Brava

40.2

- Ma Maraykan baa tahay?
- Haa, waxaan ahay Maraykan.
- Carruur immisaa walaalo tiiin?
- Saddex wiil iyo sagaal hablood baannu walaalo nahay.
- Soomaaliya ma jeceshahay?
- Haa, waan jeclahay.

immisaa = immisa ayaa

40.3

- Caashaay, ma Booramaad ka timid?
- Maya. Waxaan ka imid Ceerigaabo.
- Immisa carruur ah baa walaalo tiiin?
- Siddeed.
- Ma Ceerigaabaad ku dhalatay adigu?
- Haa. Ceerigaabaan ku dhashay.

Boorama Borama
Booramaad = Boorama ayaa aad
Ceerigaabo Erigabo, Erigavo |
Erigabo

Ceerigaabaad = Ceerigaabo ayaa
aad
Ceerigaabaan = Ceerigaabo ayaa
aan

41.0

- Immisa inan baa walaalo tiiin?
- Lix inan baannu walaalo nahay.

41.1

- Immisa inan baa walaalo tiiin?
- Inan baannu walaalo nahay.
- Adiga iyo walaalkaa ma waxaa ku dhalateen Hargeysa?
- Maya. Burcaannu ku dhalannay.
- Ma karraaniyad baa tahay?
- Maya, karraaniyad ma ihi. Milatariyad baan ahay.

Burcaannu = Burco ayaa aannu

Beginning in Somali (1966: 104–110)

Cutubka 10aad

10.1 Ciyaarta

Ciyaartu waa ay inoo fiican tahay.

Ciyaartu waxa ay inagu caawisaa in
aynu yeelanno xoog iyo caafimaad.

Ciyaartu waxa ay inagu caawisaa in
aynu helno saaxiibbo.

Eeg sawirradan. Waa maxay ciyaarta
ay ciyaarayaan carruurta sawirku?



Waa maxay ciyaarta ay ciyaaraan
carruurta dugsigiinnu?

Waa maxay ciyaaraha aad idinku
ciyaartaan?

Waa maxay ciyaarta aad adigu ka
heshaa?

U sheeg fasalkaaga sida loo ciyaaro.

inoo < *ina+u for us | för oss

inagu < *ina+ku us with | oss med
kú caawiyyaa helps sb with sth |

hjälper ngn med ngt
yeeshaa, yeelataa acquires, gets |
skaffar, får, utvecklar


aynu we, we all (inclusive) | vi, vi
alla (inkluderande)

xoog -ga strength | styrka

caafimaad -ka health | hälsa

helaa gets, finds | får, hittar

10.2 Beesha deegaanka



Eeg sawirka. Waxa uu muujinayaa
halka ay ku nool yihiin beesha
deegaanka Dugsiga Hoose ee Sheekh
Bashiir.

Beesha deegaanku waxa ay ku
noosahay kana shaqaysaa agagaarka
dugsiga.

Soo booqo beesha deegaanka ee ku
dhow dugsigiinna.

Soo ogow noocyada guryaha ay dadku
ku nool yihiin.

Soo ogow shaqooyinka kala duwan ee
ay qabtaan dadka deegaankiinnu.

Cilmiga Bulshada 2, Muqdisho 2011: 46

10.3 Dhismayaasha muhiimka ah

Dugsiyada, isbitaallada, saldhigiyada
booliska, masajiddada iyo xafiisyada
boostu waa dhismayaal muhiim ah.

Dhismayaashani waxa ay ka
dhexeeyaan beesha deegaanka oo
dhan. Qof kasta oo ka tirsan beesha
deegaanku waa uu isticmaali karaa
dhismayaashan.

kasta (adj.) every, each | varje


Isla doono sawirka iyo magaciisa.



xafiiska boosta
dugsi

isbitaal
saldhig boolis

dugsi Qur'aan
masaajid



Maxaa lagu qabtaa midkiiba
dhismayaasha beesha deegaanka?
Yaa ka shaqeeya meelahaas?
Waa maxay shaqada ay qabtaan
dadkaasi?
Weli ma soo booqatay mid ka mid ah
dhismayaashaa?

U sheeg fasalka waxa aad ku soo
aragtay.

Sawir laba ka mid ah dhismayaasha
beesha deegaanka.

Qor cidda ka shaqaysa
dhismayaashan.

Soo ogow halka uu ku yaallo
masaajidka ugu weyn deegaankiinna.

Soo ogow halka ugu dhow ee uu
dhakhtar joogo.

Soo ogow halka uu ku yaallo saldhig
boolis deegaankaaga.

Cilmiga Bulshada 2, Muqdisho 2011: 49–52

9.6 Cunto

Quraac

Maxaa aad ku quraacataa subaxdii?

quraác -da breakfast | frukost

kú quraacdaa, quraacataa eats sth
for breakfast | äter ngt till frukost



Mushaalli^S / Shurbad^N

mushaallís -da = shurbád^N -da
gruel, porridge | välling, gröt

Maxaa laga sameeyaa
mushaallida^S / shurbadda^N?

Maxaa aad ku cuntaa
mushaallida^S / shurbadda^N?



Canjeero^S ~ Laxoox^N

canjeéro^S -da = laxoóx^N -da flat
bread similiar to pancake
tunnbröd liknande pannkaka
dubaa, dubtaa fries, bakes | steker,
bakar

Qofkee baa u duba qoyskiinna
canjeerada^S / laxooxda^N?

Maxaa laga sameeyaa
canjeerada^S / laxooxda^N?



Rooti^S / Roodhi^N

roodhí^N -da = roóti^S -ga (Ind.)
bread | bröd

Maxaa laga sameeyaa
rootiga^S / roodhida^N?

Xaggee baa aan ka helnaa
burka^S / daqiiqda^N?

búr^S -ka = daqííq^N -da flour | mjöl

Qado

Maxaa aad cuntaa qadada?

Ma cuntaa soor ama bariis?

soór -ta polenta
bariis -ka (possibly from Persian:
berenj) rice | ris




Bariis

Bariisku waa badar^S / abuur^N.

abúur^N -ka = bádar^S -ka seed(s),
grain, cereal crops | frö(n), säd,
spannmål

Waxa aan ku karinnaa biyo kulul.



Hilib

Cuntadee baa aan ka helnaa
xayawaannadan?

Weydii saaxiibbadaa hilibkee baa ay
ugu jecel yihiin.

weydiiyaa, weydiisaa *asks* |
frågar



hiblibka lo'da
hiblibka geela
hiblibka digaagga
hiblibka riyaha
hiblibka idaha

idó -áha (only pl.) *sheep* | *får*



Baasto

baásto -da *pasta*

Maxaa laga sameeyaa baastada?

Ma jeceshahay baastada?



Khudrad

khudrád -da (mass.) fruit and vegetables | frukt och grönsaker

Immisa khudradood baa aad
magacaabi kartaa?


Isku day in aad cuntid khudrad maalin iskú day (imperative) try | försök
kasta.

Sawir cuntooyinka qoyskiinnu cuno
qadada.

Casho

cásho -da supper, dinner, evening meal | kvällsmat

Waqtigee baa aan cunnaa cashada?
Maxaa aad cuntaa cashada?



Meseggo^s / Hadhuudh^N

Meseggadu^s / Hadhuudhku^N waa
badar^s / abuur^N.

hadhúudh^N -ka = harúur -ka =
meséggó/masággo^s -da
sorghum | durra

Waxa uu ka baxaa dhirta.

ká baxaa, baxdaa comes out from,
grows on kommer ut ur, växer på

Ma cunnaa qoyskiinnu
meseggo^s / hadhuudh^N cashada?



Digir

digír -ta (mass.) beans | bönor

Digirta qallalani waa ay adag tahay.

qallalán (adj.) dried | torkad

Waa in aan ku karinnaa biyo kulul
si ay u jilicdo.

jilcaa, jilicdaa becomes soft | blir
mjuk

Saynis 1, Muqdisho & Harygeysa 2001: 46–49

Wadahadallo 41-42

41.2

- Magacaa?
- Magacaygu waa Xamiid.
- Xamiid ayo?
- Xamiid Xasan.
- Xaggeed ku dhalatay? xaggeed = xaggee baad
- Waxaan ku dhashay Muqdisho.
- Immisa inan baa walaalo tiihin?
- Saddex inan baannu walaalo nahay.
- Ruush ma jeceshahay?
- Maya.
- Ma macallin baad tahay?
- Haa. Macallin baan ahay.
- Xaggeed ku nooshahay?
- Waxaan ku noolahay Jabbuuti.

42.0

- Waxay walaalo yihiin shan hablood iyo siddeed inan.
- Immisay walaalo yihiin? immisay = immisa bay
- Waxay walaalo yihiin saddex iyo tobant carruur ah.

42.1

- Saddex iyo afar kolka la isu geeyo waa immisa?
- Saddex iyo afar kolka la isu geeyo waa toddoba.

kolka when | när
isu < is+u together, to each other | ihop, till varandra
isu geeyaa adds together | lägger ihop, adderar

42.2

- Saddex iyo afar isu gee!
- Waa toddoba.

42.3

- Shan iyo laba kolka la isu geeyo waa
immisa?
- Shan iyo laba waa toddoba.

42.4

- Afar iyo sagaal isu gee!
- Afar iyo sagaal kolka la isu geeyo waa
saddex iyo tobantoban.

42.5

- Saddex iyo mid isu gee!
- Waa afar.

42.6

- Toban iyo sagaal kolka la isu geeyo waa
immisa?
- Toban iyo sagaal waa sagaal iyo tobantoban.


42.7

- Kow iyo tobantoban iyo mid isu gee!
- Waa laba iyo tobantoban.

Beginning in Somali (1966: 110–113)

Cutubka 11aad

11.1 Diin iyo Maroodi



díin -ka *turtle* | *sköldpadda*

Maroodiga iyo Diinku waa saaxiib. Way isla hadlayaan.

Diinkii **wuxuu** yiri, "Maroodi, waan **kaa dul** boodi karaa."

Maroodigii **wuxuu** yiri, "**Igama dul boodi** kartid. Anigu waan weyn ahay, adiguna waad yar tahay."

Diinkii **wuxuu** yiri, "Haa, waan karaa. Waa inoo berri, Maroodi."



Diinkii wuxuu **yimid** gurigiisa.

Wuxuu **ku yiri** xaaskiisa, "Berri waxaan **ka dul boodayaa** Maroodi."

wáy = *waa ay* statement + *she / they* | *påstående + hon / de*
is (pronoun) *oneself, each other* | *sig, varandra*

islá < *is+la *with each other, together med varandra, tillsammans*

hadlaa, hadashaa *talks* | *talar, pratar*
yiri (m.), *tiri* (f.) *he, she said han, hon sa*

wáan = *waa aan* statement + *I / we* | *påstående + jag / vi*
kaá < *ku+ká *you (sg.) ... from* | *dig ... från*

boodaa, booddæ *jumps* | *hoppar*
igamá < *i+ka+ma *me ... from ... not* | *mig ... från ... inte*

wáad = *waa aad* statement + *you* | *påstående + du / ni*
tahay *you are, she is* *du är; hon är*
berri -da *tomorrow, day of tomorrow* | *morgondag*

yimid (m.), timid (f.) *he, she came han, hon kom*

wáxaan = *waxa aan* final focus + *I / we* | *slutfokus + jag / vi*
ká dúl (movement) *over* | *(förflyttning) över*

Waxay ku tiri, "Ma kartid."

wáxay = waxa ay final focus + she / they | slutfokus + hon / de


Wuxuu yiri, "Waan siraynaa."

siraa, sirtaa fools, deceives, cheats | lurar

"Haa, waa yahay, waan siraynaa," ayey tiri.

wáa yahay alright, yes, sure, fine | okej, så får det bli

ayáy/ayéy = ayáa ay focus + she / they | fokus + hon / de



Waa subax. Diinka iyo xaaskiisu waxay tageen guriga Maroodiga.

Xaaskii Diinku way **is** qarisay.

qariyaa, qarisaa hides | gömmer


Diinku wuxuu u yeeray Maroodiga.

yeeraa, yeertaa^S / yeedhaa, yeedhaa^N shouts, calls out | ropar

Wuxuu yiri, "Kaalay bannaanka.

kaálay (imp.) come | kom
bannáan (m.) open space, outside | öppen plats, utomhus

Waxaan rabaa in aan **caa dul** boodo hadda."



Diinkii **wuxuu ku yiri** Maroodiga,

i (pronoun) me | mig

"Maroodi, ma i fiirinaysaa? Kow, laba, saddex! Kar eeg!"

Maroodigu kor ayuu eegay. Diinkiina wuu **is** qariyey.

kór up | upp
ayúu = ayáa uu focus + he | fokus + han

wíúu = waa uu statement + he | påstående + han

Naagtii Diinka ayaa soo baxday.
Waxay tiri, "Ma i aragtaa?"

naág -ta woman, wife | kvinna, fru
baxaa, baxdaa comes out, goes out
| kommer ut, kommer fram

Maroodigii dhulka ayuu fiirihey. Muxuu arkay?

Af-Soomaali, Buugga 2aad. Muqdisho 1994: 204–207.

11.2 Digaagad iyo haruur

digaagád -da (Ar.) hen | höna



Digaagad yar baa heshay xabbad haruur ah.

xabbád / xábbo -da seed, grain;
piece of frö, korn, styck

Waxay tiri, "Waxaan helay xabbad haruur ah. Yaa raba in uu falo haruurka?"

falaa, fashaa ploughs, cultivates |
bearbetar, hackar, plöjer

Jiirkii wuxuu yiri, "Anigu ma rabo."

jíir^s / jíidh^N -ka mouse, rat | mus,
räätta

Bisaddii waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Ridiina waxay tiri, "Anigu ma rabo."


Digaagaddii yarayd baa tiri, "Aniga ayaa raba."

yarayd < *yar+ahayd she was small
| hon var liten

ahayd (f.), ahaa (m.) she, he, it was
| hon, han, den, det var

Markaa waxay fashay haruurkii.

márkaa(s) < mar+kaas then, that
moment | då, den där tidpunkten



Haruurkii wuu biqlay.

biqlaa, biqishaa germinates |
skjuter skott

Digaagaddii yarayd waxay tiri, "Yaa
raba in uu keeno biyo?"

Jiirkii wuxuu yiri, "Anigu ma rabo."

Bisaddii waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Ridiina waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Digaagaddii yarayd baa tiri, "Aniga
ayaa raba."

Markaa waxay keentay biyihii.



Haruurkii bay waraabisyay.

báy = baa ay focus + *she* | fokus +
hon

Dabadeed, haruurkii baa dhalay.

dhalaa, dhashaa gives birth, gets
children | föder barn, bär frukt

Digaagaddii yarayd waxay tiri, "Yaa
raba in uu gooyo haruurka? Immika
waa xilligii goynta."

gooyaa, goysaa cuts off, harvests |
skär av, skördar
ímmika/imminka = hádda now |
nu
goýn -ta harvest | skörd

Jiirkii wuxuu yiri, "Anigu ma rabo."

Bisaddii waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Ridiina waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Digaagaddii yarayd baa tiri, "Aniga
ayaa raba."

Markaas waxay goysay mirihii mír -ta (mostly plural: míró -ha)
haruurka. fruit, seed | frukt (på växt), frö



Waxay haddana weydiisay, "Yaa raba
in uu haruurka shiido oo ka samaynaya
bur?"

haddaná once again | en gång till,
igen
weydiyyaa, weydiisaa asks |
frågar
shiidaa, shiiddaa grinds, minces |
maler, krossar, smular sönder
búr -ka flour | mjöl

Jiirkii wuxuu yiri, "Anigu ma rabo."

Bisaddii waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Ridiina waxay tiri, "Anigu ma rabo."

Digaagaddii yarayd baa tiri, "Aniga
ayaa raba."

Markaas haruurkii ayey shiidday oo ay
ka samaysay bur.



Waxay haddana weydiisay jiirkii, bisaddii iyo ridii **in** ay burka ka sameeyaan canjeero ama rooti, laakiin "Ma rabno," ayey saddexduba ku jawaabeen.

Digaagaddii yarayd baa tiri, "Aniga ayaa raba."

Markaa burkii ayey ka samaysay rooti.

Waxana ay weydiisay, "Yaa raba in uu cuno **rootidan** fiican?"

Jiirkii wuxuu yiri, "Aniga ayaa raba."

Bisaddii waxay tiri, "Aniga ayaa raba."

Ridiina waxay tiri, "Aniga ayaa raba."

Digaagaddii yarayd baa qaylisay oo tiri, "Maya, maya, maya, cuni maysaan, aniga ayaa shaqeeyay oo **cunaya**."

Markaa digaagaddii yarayd sidaas ayey ku cuntay **rootidii** fiicnayd.

sameeyaa, sameysaa does, makes | gör

canjeéro -da flat bread (similar to pancake) | tunnbröd (liknar pannkaka)

ama (conj.) or | eller

laakiín (conj.) (Ar.) but | men
-ba (reinforcing particle) all, every, also, nor, none | alla, varje, också, inte heller, ingen

kú jawaabaa, jawaabtaa (Ar.) answers (to) sb. | svarar ngn

waxaná < waxa+na final focus + and | slutfokus + och

qayliyaa, qaylisaa yells, shouts | ropar, skrikar

shaqeeyaa, shaqeysaa works | arbetar

sídaas < *si+taas that way, like that så, på det där sättet

Af-Soomaali, Buugga 2aad. Muqdisho 1994: 218-222.

11.3 Hurdo

Waxa aynu u baahan nahay hurdo.

húrdo -da sleep | sömn

Hurdadu waa ay inoo fiican tahay.

Hurdada waxa aynu ka helnaa
caafimaad.

Waxa aynu seexanna marka aynu
daalno.

seexdaa, seexataa goes to bed, falls
asleep | lägger sig, somnar
daala, daashaa gets tired | blir
trött

Waxa aynu seexanna shaqada ka dib.



Tani waa Aamina.
Iyadu waa ay huruddaa.

iyáda (emphasized) she | hon
hurdaa, huruddaa sleeps | sover

Goorma ayaa aad seexataa?
Halkee baa aad seexataa?
Goorma ayaa aad toostaa?
U sheeg fasalka waxa kugu dhici
doona haddii aad hurdo kugu filan
waydo.

goór -ta moment, time | tidpunkt
goormá < *goor+ma when?, what
time? | när?
toosaa, toostaa gets up, wakes up,
stands up | stiger upp, reser sig,
vaknar
ku (obj. pronoun) you (sg.) | dig
kugú < *ku+kú you (sg.) ...
in/on/to | dig ... i/på/till
haddií (in subclause) if | om, ifall
kugú filan enough for you |
tillräcklig för dig
waayaa, waydaa fails, is unable to
(get) | misslyckas, lyckas inte (få)

Cilmiga bulshada, Fasalka 1aad. Hargeysa 2001: 51.

Wadahadallo 43–44

43.0

- Immisa jir baad tahay?
- Waxaan ahay afar iyo labaatan jir.

43.1

- Magacaagu ma Jaamac baa?
- Haa. Waa Jaamac.
- Immisa jir baad tahay?
- Waxaan ahay afartan jir.
- Ma Sawaaxili baad tahay?
- Maya. Soomaali baan ahay.
- Xaggeed ku dhalatay?
- Burcaan ku dhashay.
- Ma askari baad tahay?
- Maya. Macallin baan ahay.

xaggeed = xaggee baad

Burcaan = Burco baan

43.2

- Xasanow, adigu immisa jir baad tahay?
- Saddex iyo soddon jir baan ahay.
- Ma Xabashi baad tahay mise Sawaaxili?
- Sawaaxili baan ahay.
- Ma Keenyaad ku dhalatay?
- Haa, Keenyaan ku dhashay.
- Ma turjubaan baad tahay?
- Maya. Arday baan ahay.

mise (conj. in question) or | eller

Keenyaad = Keenya baad

Keenyaan = Keenya baan

44.0

- Walaalahaa ma Hargeysay deggan yihiin?
- Midna wuxuu deggan yahay Burco, midna Hargeysa.

Hargeysay = Hargeysa bay


44.1

- Cabdillaahiyow, xaggeed ka timid? xaggeed = xaggee baad
- Cadan baan ka imid, laakiin Burcaan ku dhashay. Burcaan = Burco baan
- Ma darawal baad tahay?
- Maya. Darawal ma ihi. Macallin baan ahay.
- Immisa inan baa walaalo tiihin?
- Labaatan inan baannu walaalo nahay.
- Walaalahaa ma Cadan bay deggan yihiin mise Burco?
- Midna waxay ku nooshahay Burco, midna Cadan.
- Walaalahaa ma jeceshahay?
- Maya.

Beginning in Somali (1966: 114–119)

Cutubka 12aad

12.1 Hooyo iyo Aabbe



Waa subax.

Hooyadu guriga ayay hagaajinaysaa.

Way xaaqaysaa.

Dharka ayay ka ururinaysaa.

Sariirta ayay goglaysaa.



Hooyadu cunto ayay karinaysaa.

Cuntadu waxay saaran tahay dabka.

Digsiga ayay walaaqaysaa.

Cuntadu waa diyaar.

Qoyskuna wuu sugayaa.



Qoysku wuu qadaynayaa.
Hooyadu waxay u dhigaysaa qadada.
Aabbuuhu wuxuu la cuntaynayaa
carruurta.
Waxay cunayaan soor.
Soortu way fiican tahay.
Qof kasta cuntuu u baahan yahay.



Hooyadu darin ayay sameynaysaa.
Waxay la fadhidaa islaan.
Waa deriskeeda.
Islaantu waxay u sheegaysaa sheeko.
Hooyadu way xiisaynaysaa.

Safiya iyo Axmed waxay caawinayaan
hooyadood. Axmed wuu xaaqayaa,
Safiyana waxay goglaysaa sariirta.
Safiya waxay karinaysaa cuntada.
Axmed wuxuu walaaqayaa digsiga.
Qof kasta cunto ayuu u baahan yahay.

Hadda cuntadii waa diyaar. Cuntadu
way fiican tahay.



Aabbuhu wuxuu goynayaa galley.
Wuxuu ka goynayaa beerta.
Majo ayuu ku goynayaa.
Jawaanno ayuu ku gurayaa.
Wuu ku daalay.



Aabbuhu wuxuu rarayaa galley.
Wuxuu ku rarayaa gaari-dameer.
Wuxuu caawinayaa dameerlaha.
Waxay ku geynayaan suuqa.
Wuu ku soo gadayaa.




Suuqa dad badan ayaa jooga.
Aabbuhu wuxuu u socdaa suuqa.
Wuxuu rabaa in uu galleyda ku gado
suumqa.
Qiimo fiican ayuu galleyda ku rabaa.

Af Soomaali 2, Muqdisho 1994: 190–200


12.2 Ilays

Ilaha ilayska



Maalintii ilayska waxa aynu ka helnaa
qorraxda.

Qorraxdu waa isha ugu muhiimsan
ilaha ilayska.



Fiiri^S / Eeg^N walxaha ka muuqda
sawirradan.


Iyaguna waa ilo ilays.

Isticmaalka ilayska

Ilayska wax baynu ku aragnaa.

Waxa kale oo aynu ka helnaa
diirrimaad
marka aynu qabow dareenno.

Jeegaan



Maxaa uu muujinayaa sawirkani?

Jeegaantu waxa ay leedahay midabbo
badan.

Goorma ayaa aad badanaa aragtaa
jeegaanta?

Saynis 1, Muqdisho & Hargeysa 2001: 62–63

11.4 Caano



Xayawaannadee baa aan ka helnaa
caanaha?

Xayawaankee baa aad ugu jeceshahay
caanihiisa?

Lisidda xoolaha




Fiiri^S / Eeg^N sida loo liso geela.

Immisa nin ayaa lista^S / lisa^N geela?

Sidee baa ay isu taagaan?

taagaa, taagtaa raises, puts upright
ställer, reser upp

Lisidda idaha




Fiiri^S / Eeg^N sida loo liso idaha.

**Ma caanaha dhayda ayaa aad
jeceshahay mise kuwa fadhiga?**

dhaý -da fresh milk | färsk mjölk
caano-fadhi -ga sour milk, yogurt
| filmjölk, kefir, joghurt
kuwa (pron.) the ... ones | de
kuwa fadhiga the sour one | den
sura

Lisidda saca



Fiiri^S / Eeg^N sida loo liso saca.

Yaa lisa saciinna?

Lisidda riyaha



Fiiri^S / Eeg^N sida loo liso riyaha.

Ma isku si baa loo lisaa riyaha iyo
geela?

Walxaha laga sameeyo caanaha

Immisa nooc oo cunto ah ayaa aan ka
samayn karnaa caanaha?

Waydii hooyadaa in ay ku tusto sida
caanaha looga dhigo dhanaan.

Maxaa la yiraahdaa^S / yidhaahdaa^N
cuntada la cuno subaxdii?

Sheeg saddex cunto oo subaxdii la
cuno.

Magacow saddex xayawaan oo aynu ka
helno caano.

Sheeg saddex cunto oo la cuno
qadada.

Sheeg saddex cunto oo la cuno
cashada.

Immisa qof ayaa lista^S / lisa^N geela?

nóoc -a (Ar.) type, kind | typ, sort

loogá < *la+u+ka
ká dhigaa, dhigtaa makes
something of something | gör ngt
av ngt
dhanáan -ka something sour, salty
| ngt surt, salt, syrligt

Saynis 1, Muqdisho & Harygeysa 2001: 50-52

Wadahadallo 44–45

44.2

- Xamiidow, aabbahaa iyo hooyadaa ma
Xabashi baa?
- Maya. Waa Soomaali.
- Ma Hargeysay deggan yihiin?
- Maya. Muqdishay deggan yihiin.
- Walaalahaa ma Muqdishay deggan yihiin?
- Haa, waxay deggan yihiin Muqdisho.
- Adigu ma sagaal jir baad tahay?
- Maya. Laba iyo toban jir baan ahay.
- Ma waxaad tahay arday?
- Haa. Arday baan ahay.

Hargeysay = Hargeysa bay
Muqdishay = Muqdisho bay

45.0

- Boorama ma xeebtay ku taallaa mise way
ka fog tahay?
- Way ka fog tahay.

xeebtay = xeebta bay
yaallaa (m.), taallaa (f.) *he, she, it*
lies | han, hon, den, det ligger

45.1

- Maxaad sheegtay?
- Nabad.
- Ma Hargeysaad ka timid?
- Maya. Booramaan ka imid.
- Ma waxaad ku dhalatay Boorama?
- Haa.
- Boorama ma xeebtay ku taallaa mise way
ka fog tahay?
- Way ka fog tahay xeebta, laakiin waan
jeclahay.
- Aabbahaa iyo hooyadaa ma Booramay
deggan yihiin?
- Maya. Waxay deggan yihiin Muqdisho.

Hargeysaad = Hargeysa baad
Booramaan = Boorama baan

Booramay = Boorama bay

45.2

- Maxamedow, ma Maraykankaad ka timid?
- Maya. Waxaan ka imid Shiinaha.
- Ma Soomaali baad tahay mise Xabashi?
- Waxaan ahay Soomaali.
- Xaggeed ku dhalatay?
- Afgooyaan ku dhashay.
- Afgooye ma waxay ku taallaa xeebta? Afgooyaan = Afgooye baan
- Maya.
- Ma Afgooyaa deggan tihiin?
- Aabbahay iyo hooyaday Afgooyay deggan yihiin, laakiin anigu Muqdishaan ku nool ahay. Afgooyaa = Afgooye baa
Afgooyay = Afgooye bay
- Maxaa aad ka shaqaysaa?
- Macallin baan ahay.

45.3

- Xaliimo, ma reer Booramaa tahay? Booramaa = Boorama baa
- Maya. Reer Hargeysaan ahay. Hargeysaan = Hargeysa baan
- Maxaad ka shaqeysaa?
- Karraaniyad baan ahay.
- Hargeysa ma xeebtay ku taallaa mise way ka fog tahay? xeebtay = xeebta bay
- Xeebta way ka fog tahay.

Beginning in Somali (1966: 119–123)

Cutubka 13aad

13.1 Moxog Weyn

*Cabdi waxa uu ahaa duq beeraley ah.
Maalin ayaa waxa uu beeray geedo
moxog ah oo waaweyn.*



*Maalin waliba waa uu waraabin jirey
moxoggii. Dhirtii waa kortay.*

*Maalin ayaa Cabdi waxa uu doonayey
in uu karsado xoogaa moxog ah.*



*Hoos ayaa uu isu qalloociyey oo
geedihii mid ka mid ah soo jiidey.*

*Laakiin dhulkii ayaa uu ka soo bixin
waayey.*

moxóg -ga (Swahili: muhogo)

*cassava, manioc | maniok,
kassava, arrowrot*

dúq -a old man | gammal man

beeraléy -da (coll.) farmers |

bönder, jordbrukare

jiray, jirtay (auxiliary) used to |
brukade

koraa, kortaa grows | *växer*

xoogáa -ga a little, a small amount
| *liten mängd, lite*

hoós + ú down, downwards | ner
isú < *is+ú

is qalloociyaa, qalloocisaa bends
(oneself) | *böjer sig*

mid ká mid ah (one that is) one of
| *(en som är) en av*

soó expresses (a) motion towards
oneself and/or (b) a completed
action

jiidaa, jiiddaa pulls | *drar*

*Cabdi geedkii waa uu soo jiidey dhowr
jeer, laakiin dhulka ayaa uu ka soo
bixin waayey.*



bixiyaa, bixisaa (trans.) *takes out*
| gör så att ngt kommer ut, tar
ut, drar upp
dhówr -ka *a few, some* | *litet antal,*
fåtal, några
jéer -ka *time* | *gång*

*Cabdi waxa uu u yeeray wiilkiisii
weynaa. Waxa ay soo jiideen geedkii,
laakiin dhulka waa ay ka soo bixin
waayeen.*

*Cabdi waxa uu u yeeray wiilkiisii
yaraa. Dhammaantood waxa ay kor u
jiideen geedkii, laakiin dhulka waa ay
ka soo bixin waayeen.*



dhammaán -ta *all* | *alla*
dhammaántood *all of them* | *de
alla*

*Cabdi waxa uu u yeeray gabadhiisii
yarayd. Cabdi, labadiisa wiil iyo
gabadhiisa yar ayaa wadajir geedkii
kor u soo jiidey, laakiin dhulka waa ay
ka soo bixin waayeen.*

wadajír -ka *unity, solidarity,
togetherness* | *gemenskap,
gemensamt, tillsammans*



Ugu dambayntii si dhaqso ah ayaa
geedkii waxa uu ka soo baxay dhulkii,
markii ay is kaashadeen Cabdi iyo
qoyskiisa.

Waxa uu ahaa geed weyn. Qof waliba
waxa uu ku dhacay dhulka.



Habeenkaas Cabdi carruurtiisa iyo
hooyadood waxa ay cuneen moxog
weyn ee leh dhadhan macaan.

dambaýn -ta *the last thing* | *det sista*
ugú dambaýntii *last of all, in the end* | *det allra sista, allra sist, till sist*
dháqso -ha *quickness* | *snabbhet, skyndsamhet*
markii (in subclause) *when* | *när*
is kaashadaa, kaashataa *gets help, assistance from each other* | *får, tar hjälp, stöd av varandra, hjälps åt*

habéen -ka *night* | *natt, (sen) kväll*

dhádhan -ka *taste* | *smak*
macaán (adj.) *sweet, tasty* | *söt, god*
Af-Soomaali 2, Muqdisho 2001: 96–98

13.2 Sameynta su'aalaha

Qofkee, Maxaa, Halkee, Immisa iyo
Waayo waa erayo su'aaleed.
Isticmaal erayadan **si** aad **ugu** buuxiso
meelaha bannaan.

1. Maxaa uu ahaa magaca beeraalaha?
2. Halkee ayuu ku noolaa?
3. Qofkee ku caawiyey in uu soo jiido
moxogga?
- 4a. Maxaa geedku uga soo baxay
dhulka?
- 4b. Waayo geedku uga soo baxay
dhulka?
5. Immisa qof ayaa ku caawisay Cabdi
in uu moxogga ka soo bixiyay dhulka?

sameýn -ta *doing, making, to do, to make* | görande, att göra
qofkee? *what person?, who? | vilken person?, vem?*
halkee? *what place?, where? | vilken plats?, var?, vart?*
waáyo? (possibly from English
'why') *why? | varför?*
su'aaleéd (adj.) (Ar.) *question | fråge-*
si + u *so that, in a way that | så att,*
för att
ugu < *u+ku
ku *with them (the words) | med dem
(orden)*
bannaán (adj.) *empty, vacant, free
| tom, ledig*
beeraále -ha *farmer | bonde,
jordbrukare*
maxáa? + ú = waáyo? *for what?,
why? | för vad?, varför?*
ugá < *ú+ká
ká baxaa *comes up, grows | kommer upp, växer*

Af-Soomaali, Fasalka 2aad. Muqdisho 2001: 98-99.

13.3 Lidad

U fiirso weerahan:

1. Moxogga Cali waa uu yaraa.
2. Moxogga Cabdi waa uu weynaa.

"Yar" iyo "weyn" waa erayo lidad isku ah.

líd -ka *opposite thing | motsats*
fiirsadaa, fiirsataa, imp. fiirsó
*looks, watches, observes | tittar,
betraktar*

Ku qor erayada **soo** socda buuggaaga
layliga: weyn, qabow, wasakh, hadda,
kulul, yar, berri, nadiif

qábów -ga cold(ness) | *kyla*
qábów (adj.) cold | *kall*

Isku aaddi lidadka.
Laba-labo u shaqeeya.

Af-Soomaali, Fasalka 2aad. Muqdisho 2001: 99.

13.4 Baahida ciyaarta


Waxa aynu u baahan nahay ciyaar.

Ciyaartu waxa ay u fiican tahay
caafimaadka jidhka.

Ciyaartu waxa ay ina gelisaa farxad.

Ciyaartu waxa ay inagu caawisaa in
aynu helno saaxiibbo.

geliyaa, gelisaa (trans.) *inserts,*
puts inside, fills | *för in ngt,*
fyller med ngt
farxad -da (Ar.) *happiness* | *lycka,*
glädje
inagú < *ina+kú *us + (with) -ing* |
oss + med (att)



Ciyaarahee baa aad adigu ciyaartaa?
Yaa aad la ciyaartaa?
U bax dibedda, ka dibna u ciyaara
Kooxo kala duwan.

dibéd /dibád -da *outside,*
outdoors | *utsida, ute,*
utomhus, utomlands
koóx -da *group* | *grupp*

Cilmiga bulshada, Fasalka 1aad. Hargeysa 2001: 55.

13.5 Layliyo

Guuri weerahan.

Ku dhig meelaha ku habboon xarfaha
waaweyn iyo joogsiyada.

1. walaashay waxa la yiraahdaa jamiilo

2. waxa ay jirtaa tobantano

3. walaalkay waxa la yiraahdaa xasan

4. waxa uu jiraa siddeed sano

5. waxa ay ku nool yihiin beledweyne

6. walaashay waxa ay aaddaa dugsiga
dhexe ee al-aqsa

7. waxa ay jeceshahay in ay barato
carabi

8. walaalkay waxa uu aaddaa dugsiga
hoose ee sheekh bashiir

9. waxa uu jecel yahay in uu barto
ingiriisi

guuriyaa, guurisaa (trans.) copies,
moves | kopierar, flyttar

dhigaa, dhigtaa (trans.) puts
placerar, ställer, sätter

joógsi -ga full stop | punkt
(skiljetecken)

sáno -da (Ar.) year | år

dhexé (adj.) middle | mellersta,
mellan-

Ingiriísi -ga English (language) |
engelska (språket)

Guuri oo dhammaystir.

Ku dhig meesha ku habboon xarfaha
waaweyn iyo joogsiyada.

1. magaca saaxiibkay waa _____

2. magaca macallinkaygu waa _____

3. waxa aan ku nool ahay _____

4. dugsiga ma aado maalinta _____ ah

5. maanta waa _____

Qor wax ku saabsan dugsigaaga.

Wadahadallo 46-47

46.0

- Muqdisho waa xaggee?
- Muqdisho waa xagga koonfureed.

46.1

- Xaggeed ka timid?
- Waxaan ka imid Muqdisho.
- Muqdisho waa xaggee?
- Waa xagga koonfureed.
- Ma waxaad ku dhalatay Muqdisho?
- Maya. Berberaan ku dhashay.
- Waa xaggee Berbera?
- Xagga woqooyi weeye.

46.2

- Soomaaliya waa xaggee? Ma xagga galbeéd baa? galbeéd *western* | väst-, västlig
- Maya. Waa xagga bari.
- Ma Soomaali baad tahay?
- Haa, Soomaali baan ahay, laakiin waxaan ku dhashay Itoobiya.
- Ma Itoobiyaad deggan tahay mise Soomaaliya?
- Waxaan deggan ahay Soomaaliya.
- Aabbahaa iyo hooyadaana ma Soomaaliyay deggan yihiin?
- Maya. Waxay deggan yihiin Itoobiya. Soomaaliyay = Soomaaliya bay

46.3

- Ma nabad baa?
- Waa nabad.
- Magacaa?
- Magacaygu waa Cali.
- Magacayguna waa Yuusuf.

- Barasho wanaagsan.
- Barasho wanaagsan.
- Ma Ceerigaabaad ka timid? Ceerigaabaad = Ceerigaabo baad
- Maya. Waxaan ka imid Baraawe.
- Waa xaggee Baraawe?
- Baraawe waa xagga koonfureed.
- Ma jeceshahay?
- Haa.

47.0

- Xaggee tagaysaa?
- Hargeysaan tagayaa.
- Hargeysa waa xaggee?
- Waa xagga woqooyi.

47.1

- Xaggee tagaysaa?
- Ingiriiskaan tagayaa.
- Waa xaggee?
- Waa xagga woqooyi.
- Ma Ingiriiskaad deggan tahay?
- Maya. Waxaan deggan ahay Keenya.
- Ma Sawaaxili baad tahay?
- Maya. Waxaan ahay Xabashi.


Beginning in Somali (1966: 124–128)

Cutubka 14aad

14.1 Meesha dugsigu uu ku yaallo


Eeg meelaha ay ku yaallaan
dugsiyadani.

Sawirkee baa u eg meesha dugsigiinnu
ku yaallo?




Dugsigani waxa uu ku dhex yaallaa
buuraha.

Buuruhu waa ay dhaadheer yihiin.




Dugsigani waxa uu ku dhow yahay
badda.


Dhulka badda ku dhowi waa dhul
siman oo ciid badan.



Dugsigani waxa uu ku dhex yaallaa
kaynta.
Geedo badan baa ku dhow dugsigan.




Dugsigani waxa uu ku dhex yaallaa
dhul beereed.
Waxa aynu arki karnaa dalagga
baxaya.



Dugsigani waxa uu ku dhex yaallaa
magaalo weyn.
Waxa hareeraha ka xiga dhismayaal
badan.

Xaggee baa uu dugsigiinnu ku yaallaa?
Ma waxa uu ku dhex yaallaa buuraha?
Ma waxa uu ku dhow yahay badda?
Ma waxa uu ku dhex yaallaa kaynta?
Ma waxa uu ku dhow yahay dhul
beereed?
Ma waxa uu ku dhex yaallaa magaalo
yar?
Ma waxa uu ku dhex yaallaa magaalo
weyn?

14.2 Buuraha




Weligaa ma aragtay buuro? Halkee
baa aad ku aragtay?

Buurta ugu dheer dalkeenna waxa la
yiraahdaa^S/yidhaa^N buurta Surad. Ma
taqaannaa magacyada buuro kale?

Waxa aynu buuraha ku arki karnaa ilo
biyo ah oo badan. Buuraha qaar waxa
ka dul baxa dhir.


Sawir buuro leh geedo iyo il biyood.

14.3 Dooxooyinka



dooxo -da *valley | dal, dalgång*

Buuruhu waa ay dhaadheer yihiiin.
Dhulka siman ee u dhexeeyaa buuraha
ayaa loo yaqaan dooxo.




Dooxooyinka qaar baa ballaaran^S/
ballaadhan^N.
Dooxooyinka ballaarani^S/ballaadhani^N
waxa ay leeyihiiin carro aad u fiican.
Dadku waa ay jecel yihiiin in ay
beertaan dooxooyinka ballaaran^S/
ballaadhan^N.
Dadku waxa ay ka beeraan galley,
haruur^S/hadhuudh^N, cambe iyo
dalagyo kale.

Waxa kale oo ay dadku ka beeraan
yaanyo^S/tamaandho^N, baradho,
kaabash, basbaas iyo liin-macaan.

Dooxooyinka qaar waxa mara webiyo.
Dooxooyinka qaar ma laha webi.
Kuwan waxa loo yaqaan dooxooyinka
oommanaha ah.
Waa ay adag tahay in la beerto
dooxooyinkaas.

14.4 Kaynta



Weligaa ma aragtay kayn?

Kayntu waxa ay leedahay geedo
badan.
Geeduuhu waxa ay leeyihiin xididdo
dhaadheer.
Xididdadu waxa ay isku hayaan ciidda.


Kaynta waxa harsada^S/hadhsada^N
dadka, xoolaha iyo ugaarta^S/
ugaadha^N.

Kayntu waxa kale oo ay qabataa
dabaysha.

Reer-guuraaga qaar baa dhex dega
kaynta.

Geedaha waxa aynu u adeegsannaa
dhismaha, xaabada iyo dhuxusha.


14.5 Bannaannada



Eeg sawirkan. Bannaannadu waa dhul
siman oo hooseeya. Bannaannadu waxa
ay leeyihiin ciid fiican. Caws iyo geedo
gaagaaban ayaa ka baxa bannaannada.
Dadka qaar baa xoolaha daajiyaa
bannaannada.

Sawir xoolo daaqaya bannaan.

14.6 Dhul xeebeed



Ma waxa aad ku noosahay xeebta
agteeda?

Xeebtu waa dhulka u dhow badda.
Xeebtu waa dhul hooseeya oo siman.
Waa dhul kulul oo oommane ah.


Waa maxay shaqada ay dadka xeebta
ku nooli qabtaan?

nooli subject form of nool

Cilmiga Bulshada 2, Muqdisho & Hargeysa 2010-2011, 61-69

13.6 Jabaq

U bax dibadda. Aad wax u dhegayso.
Jabaqdee ayaa aad maqli kartaa?



jabáq -da, pl. jabaqyó -da *sound, noise* | (*o*)ljud
dhegaystaa, dhegaysataa, imp.
dhegayso *listens* | lyssnar
maqlaa, maqashaa *hears* | hör

Ilaha jabaqda


Waa maxay walaxda jabaqda
samaynaysa sawir kasta?

Maxaa ay inoo sheegaysaa jabaqdu?

Walxaha nooli jabaq ayay sameeyaan.

nooli subject form of nool

Fiiri^S / Eeg^N sawirradan.



Walxahan waa noole. Ma jabaq isku
mid ah ayaa ay sameeyaan walxaha
nool oo dhammi?

noole -ha *living being, organism* |
levande varelse, organism
dhammi subject form of dhan

Laba-laba u wada shaqeeya.

Sameeyaa jabaqda xayawaannada kala
geddisan.

Ma qiyaasi kartaa xayawaanka
jabaqda sameeyay?

Dhammaan walxaha nool waxa ay
sameeyaan jabaq.

Ma sameeyaan jabaq walxaha aan
noolayn?

Fiiri^S / Eeg^N sawirradan.

geddisan (adj.) = duwán changed,
different | olik, förändrad,
annorlunda
qiyaasaa, qiyaastaa estimates,
makes a qualified guess |
uppskattar, beräknar, gör en
kvalificerad gissning

aan (in subclause) not | inte
aan ahayn (in subclause) is/are
not | är inte
aan noolayn < *nool+ahayn that
are not living | som inte är
levande



Kuwani waa walxo aan noolayn.

Ma sameeyaan jabaq walxaha
aan noolayn?

Ma isku wada mid baa jabaqdoodu?

Samee jabaqda ay sameeyaan walxaha
aan noolayn.

Weydii saaxiibkaa in uu kuu sheego
waxa ay tahay.

kuú < *ku+u you + to | dig + till

Jabaqda kala duwan ee deegaanka

Waxa aynu maqalnaa jabaqyo kala
duwan maalin kasta.

Jabaqdee baad ka maqashaa
gurigaaga?

Jabaqdee baad ka maqashaa garoonka

deegáan -ka settlement, area, |
bosättning, område


garoon -ka (En. 'ground') ground,
field | plan, fält

ciyaaraha ee dugsigaaga?
 Jabaqdee baad ka maqashaa fasalka
 dhexdiisa?
 Ma maqashaa jabaqda magaalada?
 Jabaqdee baad ka maqashaa xafadda
 arooska?

xaflad -da party | fest
 aroos -ka wedding | bröllop

Jabaqda muusikada

Fiiri^S ~ Eeg^N sawirka.



Ma taqaannaa magacyada qalabkan
 muusikada ah?
 Ma jeceshahay jabaqda ay
 sameeyaan?
 Kee baa sameeyaa jabaqda ugu dheer?
 Magacow saddex jabaq oo Aad ka
 maqasho guriga.
 Magacow laba jabaq oo Aad ka
 maqasho dugsiga.
 Magacow laba jabaq oo Aad ka
 maqasho garoonka ciyaaraha.
 Magacow jabaqda Aad ka maqasho
 masaajidka.
 Sheeg laba magac oo qalab muusig ah.

qálab -ka (coll.) instrument, tool |
 instrument, verktyg

kee? which? | vilken?

Saynis 1. Muqdisho & Hargeysa 2001: 64–68.

Wadahadallo 47–48

47.2

- Muqdisho waa xaggee?
- Waa xagga koonfureed.
- Ma xeebta bay ku taallaa mise berriga?
- Waxay ku taal xeebta.
- Ma Muqdishaad jeceshahay mise Hargeysa?
- Waxaan jeclahay Muqdisho.
- Ma Muqdishaad tagaysaa?
- Haa.

47.3

- Magacaygu waa Yuusuf. Adiga magacaa?
- Magacaygu waa Sahra.
- Ma Soomaaliyad baa tahay?
- Haa. Wuxaan ahay Soomaaliyad.
- Ma Burcaad ku nooshahay?
- Maya. Wuxaan ku nool ahay Boorame.
- Waa xaggee Boorame?
- Waa xagga galbeed.

48.0

- Burco xaggay ka xigtaa Muqdisho? xaggay = xaggee bay
- Waxay ka xigtaa xagga woqooyi.

48.1

- Ma nabad baa?
- Waa nabad.
- Inanta magaceed?
- Magaceedu waa Caasha Saciid.
- Saciid ayo?
- Saciid Xamiid.
- Ma Burcay deggan tahay? Burcay = Burco bay
- Haa, waxay deggan tahay Burco.

- Burco xaggay ka xigtaa Muqdisho? **xaggay = xaggee bay**
- Waxay ka xigtaa xagga woqooyi.
- Ma xeebtay ku taallaa mise way ka fog tahay? **xeebtay = xeebta bay**
- Way ka fog tahay.
- Adigu xaggeed deggan tahay? **xaggeed = xaggee baad**
- Waxaan deggan ahay Ceerigaabo.
- Ma Ceerigaabaad ka shaqaysaa? **Ceerigaabaad = Ceerigaabo baad**
- Maya, Berberaan ka shaqeeyaa.
- Berbera ma xeebtay ku taallaa? **Berberaan = Berbera baan**
xeebtay = xeebta bay
- Haa. Waxay ku taallaa xeebta.
- Ma jeceshahay Berbera?
- Haa. Waan jeclahay.

48.2

- Nuura, ninkaasi ma Maraykan baa?
- Haa, waa Maraykan.
- Muxuu qabtaa?
- Waa macallin. Wuxuu ka shaqeeyaa
Hargeysa. Adigu xaggeed ka shaqaysaa? **xaggeed = xaggee baad**
- Waxaan ka shaqeeyaa Ceerigaabo.
- Maxaad qabataa?
- Milatari baan ahay.
- Ceerigaabo, Berbera xaggay ka xigtaa? **xaggay = xaggee bay**
- Bari bay ka xigtaa.
- Xeebta ma ka fog tahay?
- Haa, Ceerigaabo xeebta way ka fog tahay.

Beginning in Somali (1966: 128–132)

Cutubka 15aad

15.1 Xayawaanka biyaha ku jira

*U fiiro sawirka oo u sheeg
macallinkaaga waxa aad ku aragtid.*

ku jira (*that are*) *in* | (*som finns*) *i*

*Dabadeed adigu kor u akhri
sheekadan.*

kór ú ákhri *read aloud* | *läs högt*



Maalin maalmaha ka mid ah ayaa
bisadi gurigeedii ka tagtay. Waxa ay
tagtay meel ay biyo ku jiraan. Biyihii
ayaa ay eegtay oo ay ku aragtay
hooskeedii.

Bisaddii waxa ay u tagtay digaagad,
waxaana ay ku tiri, "**Digaagadey**, bal
soo orod. Bisad ayaa ka muuqata
biyahan. Waa in aad arrintan i
fahamsiisaa."

hóos -ka *shadow* | *skugga*
waxaana < *waxaa+na* *focus + and*
| *fokus + och*

tiri^s/ tidhi^N (f.), **yiri^s/ yidhi^N** (m.)
said | *sa*

bál *just, simply, now* (*adds*
emphasis to imperative) | *då, nu*
(*eftertryck vid uppmaning*)


arrín -ta *matter, affair, situation* |
sak, händelse, angelägenhet
fahamsiyyaa, fahamsiisaa (Ar.)
explains, makes sb understand |
förklrarar, får ngn att förstå

Digaagaddii waxa ay soo qaadatay baaldi. Dabadeed waxa ay ku ordeen biyihii. Digaagaddii iyaduna waxa ay iska dhex aragtay biyihii.



Digaagaddii waxa ay tiri, "Kuma arko halkan bisad. Laakiin waxa aan ku arkaa biyaha **dhexdooda** digaagad. Adigu waa in aad i caawisaa. Bal orod oo inoogu yeer daanyeerkha. Isagu waxa uu leeyahay gacmo dhaadheer. Waxa uu awoodaa in uu digaagadda dibadda inoogu soo saaro."

Bisaddii waxa ay aadday daanyeerkii oo ku tiri, "**Daanyeerow**, dhaqso u kaalay. Digaagad ayaa biyaha ku dhex jirta ee waa in aad noo soo gurmataa."



baáldi -ga bucket | hink, spann
iská < *is+ká oneself ... from/in |
sig själv ... från/i

dhéx -da middle; inside, in the
middle of, among, between |
mitt, mitt i, inuti, mellan

kumá < *kú+má in/on ... not | i/på
... inte

hálkan this place, here | denna
plats, här

caawiyyaa helps | hjälper

inoogú < *ina+ú+(k)ú for us ... to
| för oss ... till

yeeraa^S / **yeedhaa^N** shouts | ropar
daanyeér -ka monkey | apa

dhéer, distr. **dhaadhéer** long |
långa

awoodaa, **awooddaa** is able to, is
capable of | klarar, är i stånd att,
kan

noó < *na+ú for us | för oss

ú gurmadaa, **gurmataa** hurries to
rescue | undsätter (hjälper ngn
snabbt i svår situation)

Daanyeerkii iyo bisaddii waxa ay
yimaadeen biyihii **dushooda**.
Daanyeerkii waa uu qoslay.

qoslaa, qososhaa *laughs | skrattar*



Daanyeerkii waxa uu u yeeray bisaddii
iyo digaagaddii, waxaana uu tusay in
cid waliba ay iska arki karto biyaha
haddii uu hoos u fiiriyo.

cíd -da *people; somebody | folk;*
någon
walba / waliba *every | varje*

Maxaa ay arkeen?

Qof waliba markii uu hoos u eegay
biyihii waxa uu arkay hummaaggiisa.

markii *(in subclause) when | när*
hummáag -ga *image, silhouette*
spegelbild

Af-Soomaali, Fasalka 3aad. Muqdisho 2001: 79-81.

15.2 Baahida nabadda


Waxa aynu u baahan nahay nabad.

Kulligeen waxa aynu u baahan nahay
nabad.

Waalidkeennu waxa uu inagu caawiyaa
in aynu nabad dareenno.



dareemaa, dareentaa *feels |*
känner

Guryaheennu waxa ay inagu caawiyaan
in aynu nabad dareenno.



Innagu waxa aynu ku caawin karnaa
dadka kale in ay nabad dareemaan.

innága (emphasized) *we* (you included) | *vi* (du/ni inräknade)



Adiga yaa **ku** ilaaliya?

yaa (focused) *who?* | *vem?*
ku (object pron.) *you* | *dig*

Adigu ma ilaalisaa walaalahaaga kaa
yaryar?

Sheeg waxyaabaha aad ka baqatid.

ká baqdaa, baqataa *is afraid of* |
är rädd för
baqatid = baqato

Cilmiga bulshada, Fasalka 1aad. Hargeysa 2001: 54.

15.3 Nadaafadda jirka^S/jidhka^N

Waxa aad ku soo baratay fasalkii
1aad magacyada kala duwan ee
qaybaha jirkeenna^S/jidhkeenna^N.
Fasalkan 2aadna waxa aad ku baran
doontaa sida jirka^S/jidhka^N loo
nadiifiyo.

Nadaafaddu waxa ay muhiim u tahay
caafimaadka jirka^S/jidhka^N.
Nadaafadda macnaheedu waxa uu
yahay ka ilaalinta wasakhda
jirka^S/jidhka^N. Jeermisku waxa uu ku
nool yahay wasakhda. Jeermisku waxa
uu keenaa cudurro.


Waa in aynu si habboon u nadiifinnaa
jirkeenna^S/jidhkeenna^N.

bartaa, barataa, inf. barán *learns* |
lär sig

qaýb -ta *part* | *del*

mácne -ha (Ar.) *meaning* |
betydelse
ka ilaalín -ta *protection against* |
skyddande mot
jeérmis -ka (En.) *germs* | *baciller*

cúdur -ka *disease, illness* | *sjukdom*



Sidee baad jirkaaga^S/jidhkaaga^N u
nadiifisaa?

baad = baa aad *focus + you* |
fokus + du/ni

Maxaa aad isticmaashaa^S marka aad
jirkaaga^S dhaqaysid^S?


Maxaa aad adeegsataa^N marka aad
jidhkaaga^N maydhaysid^N?

Maxaa aad ku qallajisaa
jirkaaga^S/jidhkaaga^N?

qallajiyaa, qallajisaa *dries sth |*
torkar ngt

Dhaq^S jirkaaga^S/Maydh^N jidhkaaga^N
maalin walba.

Isticmaal^S/Adeegso^N biyo iyo
saabuun.




Isku gallaji shukumaan^S/tuwaal^N
nadiif ah ama qorraxda.

shukumáan^S-ka (It. 'asciugamano') = tuwáal^N-ka (En.) *towel | handduk*
qorráx -da sun | sol

Marka jirkaagu^S/jidhkaagu^N yahay
nadiif
waxa aad dareentaa caafimaad iyo
farxad.

Nadiifinta qaybaha jirkas/jidhka^N

nadiifín -ta (Ar.) *cleaning | rengörning*



Nadiifinta timaha

Ilaali nadaafadda timahaaga.

Ku dhaq^S/maydh^N biyo iyo saabuun
maalin walba.

Shanlee^S/Feedh^N timahaaga maalin
walba.

shanleeyaa, shanlaysaa *combs sth | kammar ngt*

Saynis, Fasalka 2aad. Hargeysa 2010 & Muqdisho 2011: 1–3.

Wadahadallo 49–50

49.0

- Ceerigaabo ma bari bay ka xigtaa Berbera?
- Haa, bari bay ka xigtaa Ceerigaabo.

49.1

- Cumarow, xaggeed ka timid?
- Muqdishaan ka imid.
- Ma Muqdishaad ku dhalatay?
- Maya. Burcaan ku dhashay.
- Burco ma bari bay ka xigtaa Muqdisho?
- Maya. Waxay ka xigtaa waqooyi.
- Walaalkaa ma Burcuu deggan yahay?
- Haa.
- Adigu xaggeed deggan tahay?
- Muqdishaan deggan ahay.

49.2

- Axmedow, Muqdisho ma galbeed bay ka xigtaa Beledweyne?
- Maya. Koonfur bay ka xigtaa.
- Aabbahaa iyo hooyadaa ma Beledweynay deggan yihiin? Beledweynay = Beledweyne bay
- Haa. Waxay deggan yihiin Beledweyne.
 Adiga hooyadaa xaggay deggan tahay? xaggay = xaggee bay
- Waxay deggan tahay Hargeysa.
- Waa immisa jir?
- Waxaa weeye laba iyo lixdan jir.
- Immisa carruuraad walaalo tiihin? carruuraad = carruur ah ayaad
- Waxaannu walaalo nahay lix inan iyo inan.

49.3

- Xasan, maxaad sheegtay?
- Nabad.
- Xaggeed ka timid?

- Wuxaan ka imid Ingiriiska.
- Ma Ingiriiskaad ku nooshahay?
- Maya. Keenyaan ku nool ahay. Adigu xaggeed ku nooshahay?
- Muqdishaan ku nool ahay. Ma siyaasiyaad *siyaasiyaad = siyaasi baad*
tahay?
- Haa, siyaasiyaan ahay. *siyaasiyaan = siyaasi baan*
- Immisa carruuraad walaalo tiiin? *carruuraad = carruur ah ayaad*
- Afar hablood baannu walaalo nahay.
- Ma Keenya bay deggan yihiin?
- Haa.

50.0

- Boorame ma kor bay ka xigtaa Hargeysa?
- Maya. Kama xigto. Galbeed bay ka xigtaa Hargeysa.

50.1

- Nabad miyaa?
- Waa nabad.
- Ma reer Hargeysaad tahay?
- Maya. Waxaan ahay reer Burco.
- Burco Hargeysa xaggay ka xigtaa?
- Xagga bari bay ka xigtaa.
- Ma Burcaad ku dhalatay?
- Haa, Burcaan ku dhashay. Adigu ma Muqdishaad ka timid?
- Haa, waxaan ka imid Muqdisho, laakiin Ceerigaabaan ku dhashay.

Beginning in Somali (1966: 133–139)

Cutubka 16aad

16.1 Ayeeyo iyo Waraabe

Tani waa sheeko ku saabsan gabar yar oo soo booqanaysey ayeyadeed. Waxa ay ayeyadeed ku noolayd guri ku yaal kaymaha dhexdooda.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa hooyadeed waxa ay u sheegtay gabadhii in ay ayeyadeed soo salaanto, una geyso ukun. Markii gabadhii yarayd gaartey gurigii ayeyadeed waxa ay garaacday albaabkii oo isla markiina ay gashay.

Gabadhii waxay sariirtii ayeyadeed ku aragtay wax indho waaweyn, waxa ayna ku tiri, "Ayeeyo, indhahaagu waaweynaa."

Dhurwaagii gabadha ayeyadeed cunay oo sariirta jiifa ayaa ku yiri, "Haa, sababtoo ah si fiican ayaan kuu arki karaa."

Gabadhii haddana waxa ay tiri, "Ayeeyo, dhegahaagu waaweynaa." Dhurwaagii waxa uu yiri, "Sababtoo ah si fiican ayaan kuu maqli karaa."

Ugu dambayntii waxa ay gabadhii ku tiri, "Ayeeyo, ilkahaagu dhaadheeraa." Dhurwaagii waxa uu yiri, "Sababtoo ah waxa ay igu kaalmeeyaan in aan wax ku cuno."

Isla markiiba dhurwaagii waxa uu ku soo boodey gabadhii oo iyaduna isla markiiba qaylisay. Gabadhii aabbaheed oo meel u dhow joogey ayaa u soo orday oo ka fujiyey dhurwaagii. Waa uu cararay dhurwaagii.

Gabadhii oo faraxsan ayaa u mahad celisey aabbaheed.


Weydiimo:

1. Ma leedahay ayeeyo?
2. Ma jeceshahay in aad soo booqato ayeeyadaa?
3. Xaggee bay joogtaa?

Af-Soomaali 1, Muqdisho 2001: 28


16.2 Hantida qoyska

Hantida qoyska magaalada



Rooble qoyskoodu waxa uu ku nool
yahay magaaladan.

Waxa uu qoysku leeyahay dukaan.
Dukaanku waxa uu u yahay hanti.




Kani waa Rooble aabbihiis.

Waxa uu ka shaqaynayaa dukaankiisa.

Maxaa uu ku iibiyaa dukaanka?

Alaabta taalla dukaanku waa hanti uu
leeyahay.




Kani waa Rooble adeerkii.

Waxa uu leeyahay baskan.

leeyahay *owns* | äger

Basku waa hantidiisa.

Waa uu ilaashadaa hantidiisa.



Kani waa Cumar.

Waxa uu leeyahay gaari-dameer^S /
gaadhi-dameer^N.


Waxa uu kaga shaqeeyaa magaalada.

Waxa uu gaari-dameerka^S / gaadhi-
dameerka^N ku qaadaa jawaannada
culus.

Meheradaha qoyska


Eeg sawirradan. Waxa ay ina tusayaan meheradaha kala duwan ee qoysaska magaalada.

Isku hagaaji: dukaanle, makhaayadle, darawal tagsi, dawaarle



Qoyskiinnu ma leeyahay meherad?
Waa maxay meheradda qoyskiinnu?

Hantida qoyska beeraleyda ah



Kani waa Hodan aabbaheed.
Waxa uu qodayaa beertiisa.
Isaga ayaa leh beerta.

Beertu waa hantidiisa.
Dibida iyo irfidu waa hantidiisa.
Isagu waa uu ilaashadaa hantidiisa.


Waxtarka geedaha



Sidee baa ay geeduhu wax
inoogu taraan?

Dadku waxa ay geedaha qaar
ka helaan cunto.

Xooluhu waxa ay ka helaan
cunto qaar ka mid ah geedaha
iyo dhirta.




Geedaha waa aynnu harsannaa.

Geedaha qaar ka mid ah
waxa aynnu ka helnaa dawo.

Sheeg waxtar kale oo ay
geedaha iyo dhirtu inoo leeyihiin.


Hantida qoyska reer-guuraaga



Geeddi qoyskoodu waa reer-guuraa.
Waxa uu leeyahay ari. Xooluhu waa u
hanti. Waxa kale oo uu qoysku
leeyahay aqal-Soomaali iyo awr. Awrtu
waxa ay u qaaddaa aqalka.

Reer-guuraagu ma laha dukaanno. Ma laha beero. Reer-guuraagu waxa uu leeyahay xoolo.

Hantida qoyska kalluumaystaha



Kani waa Saynab aabbaheed.

Isagu waa kalluumayste.

Waxa uu kalluun ku soo dabanyaa doonnidiisa.

Doonnidu waa hantidiisa.

Waxa kale oo uu leeyahay shabag^S/shabakad^N.

Shabagga^S/shabakadda^N waxa uu ku soo dabtaa kalluunka.

Cilmiga Bulshada 1, Muqdisho & Hargeysa 2001: 58–63, 66-68, 71

15.4 Cimilo-gooreed

Waa sidee cimilo-gooreedku maanta?
Cimilo-gooreedku waa uu is beddeli
karaa maalin kasta.

cimílo -da climate | klimat
cimilo-gooréed -ka weather |
väderlek, väder
beddelaa, beddeshaa changes |
förändrar


Waxtarka daruuraha

daruúr -ta cloud | moln



Fiiri^S/Eeg^N sawirkan.
Waa sidee hawada samadu sawirkan?
Waa maxay waxtarka daruuruuhu?

hawo -da air | luft
sámo -da sky | sky, himmel



Daruuruuhu waxa ay keenaan roob.
Waa maxay midabka daruuraha
roobka?



Daruuruuhu waxa ay inaga daboolaan
qorraxda.

Maalinta ay daruuri jirto hawadu waa
qabow.

Waa in aad xirataa dhar culus marka
aad qabow dareento.

inagá < *ina+ká us + from | oss +
frän

qábow -ga cold(ness) | kyla


xirtaa, xirataa puts on, dresses in |
tar på sig, klär sig i

Waxtarka dabaysha



Waa sidee hawada dabayshu
sawirkan?

Waa maxay waxtarka dabayshu?



Dabayshu dharka ayaa ay degdeg
inoogu qallajisaa.

degdeg -ga *haste, hurry, rush,
quickness* | *snabbhet, hast,
brådska*



Dabayshu badarka^S/xabuubka^N ayaa
ay ka qaaddaa buushaha.

badar^S -ka = **xabuub^N -ka** *grains,
crop* | *spannmål*
buúshe -ha *chaff, husk* | *agnar,
skal*

Khatarta dabaysha

Dabayshu waxa ay noqon kartaa mid
caadi ah ama mid xoog badan.

caádi -ga *sth ordinary, normal* |
ngt vanligt, normalt
caádi ah *ordinary, normal* | *vanlig,
normal*

Dabaysha xoogga badani waxa ay
noqon kartaa khatar.

Fiiri^S/Eeg^N sawirradan.
Maxaa ay dabayshu samaynaysaa?




Dabaysha xoogga badani waxa ay
ridi kartaa dhirta.

Dabaysha xoogga badani waxa ay
jebin kartaa tiirarka korontada^S/
laydhka^N.



Dabaysha xoogga badani waxa ay
dumin kartaa guryaha.



Dabaysha xoogga badani waxa ay
qaaddaa carrada sare ee wanaagsan.
Carrada sare waxa ay u fiican tahay
wax beerashada.

jebiyaa, jebisaa *breaks* | *bryter*
(av)
tíir -ka, pl. tiirár *pole, pillar* |
stolpe, pelare
korónto^S -da = laydh^N -ka
electricity | *el*

dumiyyaa, dumisaa *tears down,*
demolishes | *raserar, demolerar*

cárro -da *soil* | *jord*
saré (adj.) *top, surface* | *övre, yt-,*
topp-
beerásho -da *farming, cultivation* |
odling



Dabayshu waxa ay kicisaa dabka.


kiciyaa, kicisaa *wakens, starts, causes* | väcker, startar, orsakar




Dabayshu waxa ay kala kaxaysaa
daruuraha.

kaxeeyaa, kaxaysaa *drives* | *driver*

Waxtarka qorraxda



Waa sidee hawadu sawirkan?
Waa maxay waxtarka ay qorraxdu
leedahay?



Qorraxdu waxa ay inoo qallajisaa
badarka^S/xabuubka^N.



Qorraxdu waxa ay caawisaa
koritaanka dhirta.

koritaan -ka *growth | tillväxt,
grod*

Khatarta qorraxda




Qorraxda badani waxa ay dishaa
dhirta.

dilaa, dishaa *hits, kills | slår, slår
ihjäl, dödar*

Qorraxda badani waxa ay dishaa
cawska.

Qorraxda badani waxa ay dishaa
xayawaannada.

Waxtarka roobka



Ma is beddelaan dhirta iyo cawsku
marka uu roobku da'o ka dib?

Ma is beddeshaa urta hawadu marka
uu roobku da'ayo?

da'aa, da'daa rains | regnar
marka ... da'o ka dib when it has
rained | efter att / när det har
regnat

ur -ta smell | lukt
marka ... da'ayo when it is raining
| när det regnar



Cawsku ma waxa uu si fiican u baxaa
xilliga roobka mise xilliga abaarta?

abaár -ta drought | torka, missväxt

Khatarta roobka

Weligaa ma aragtay roob xoog leh oo
da'aya? Fiiri^S/Eeg^N sawirradan.

welígaa you ... ever | du ... någon
gång



Roobka xoogga badani waxa uu qaadaa
carrada nafaqada leh.
Ma aragtay daad wata carro?
Roobka xoogga badani waxa uu
burburin karaa dhirta.

nafáqo -da nutrition | näring
daad -ka flooding | översvämnning
wataa, wadataa carries (along) |
för (med sig)

burburiyaa, burburisaa destroys |
förstör

Layli

1. Magacow laba waxtar oo ay
qorraxdu leedahay.
2. Magacow laba khatarood oo ay
qorraxdu leedahay.
3. Magacow laba waxtar oo uu roobku
leeyahay.
4. Magacow laba khatarood oo uu
roobka badani leeyahay.

Saynis 1, Muqdisho & Hargeysa 2001: 69–78

Wadahadallo 50–51

50.2

- Ma Booramaad deggan tahay?
- Haa, waxaan deggan ahay Boorame.
- Boorame ma kor bay ka xigtaa Hargeysa
mise koonfur bay ka xigtaa?
- Galbeed bay ka xigtaa Hargeysa.
- Muqdisho xaggay ka xigtaa Hargeysa iyo
Boorame?
- Waxay ka xigtaa xagga koonfureed.

50.3

- Jaamacow, ma Burcaad ka timid?
- Haa, Burcaan ka imid.
- Hargeysa xaggay ka xigtaa Burco?
- Burco bari bay ka xigtaa Hargeysa.
- Miyay ka fog tahay?
- Maya. Kama foga.
- Muqdisho xaggay ka xigtaa Burco?
- Hoos bay ka xigtaa.
- Hooyadaa ma waxay ku nooshahay Burco?
- Haa, laakiin waxay ku dhalatay
Ceerigaabo.

51.0

- Muqdisho Hargeysa intay u jirtaa? intay = intee bay
- Waxay u jirtaa shan boqol oo mayl.

51.1

- Ma Ceerigaabaad ku dhalatay?
- Maya. Wuxaan ku dhashay Baraawe.
- Muqdisho xaggay ka xigtaa?
- Waxay ka xigtaa xagga waqooyi.
- Intay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa boqol iyo labaatan mayl.

- Ma Baraawaad deggan tahay?
- Haa, Baraawaan deggan ahay.
- Maxaad qabataa?
- Wuxuu ahay macallin.

51.2

- Maxaad sheegtay?
- Nabad baan sheegay.
- Ninkaasi ma reer Booramaa?
- Maya. Waa reer Ceerigaabo.
- Ma Ceerigaabuu ku dhashay?
- Maya. Wuxuu ku dhashay Hargeysa.
- Ceerigaabo Boorame xaggay ka xigtaa?
- Waxay ka xigtaa bari.
- Intay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa laba boqol iyo konton mayl.
- Hargeysana?
- Hargeysana waxay u jirtaa laba boqol oo mayl.

Booramaa = Boorame baa

51.3

- Caliyow, ma Muqdishaad tagaysaa?
- Haa, waxaan tagaya Muqdisho.
- Ma xagga galbeed baa?
- Maya, waa xagga koonfureed.
- Hargeysa intay u jirtaa? Ma fog tahay?
- Haa, way fog tahay. Waxay u jirtaa shan boqol oo mayl.
- Baraawe xaggay ka xigtaa?
- Waxay ka xigtaa waqooyi. Adigu ma Muqdishaad ku nooshahay mise Hargeysa?
- Wuxuu ahay macallin Burcaan tagaya.

Beginning in Somali (1966: 139–144)

Cutubka 17aad

17.1 Ma doonaysaa babbaay?



Ma doonaysaa babbaay?
Haddii aad rabtid babbaay
Si aad u hesho babbaay
Adigu beero babbaay.


babbaay -ga papaya | papaya



Ma doonaysaa gallay?
Haddii aad rabtid gallay
Si aad u hesho gallay
Adigu beero gallay.



Ma doonaysaa hadhuudh?
 Haddii aad rabtid hadhuudh
 Si aad u hesho hadhuudh
 Adigu beero hadhuudh



- b. Xoolahee baa ina siiya caano?
- t. Xoolahee baa ina siiya hilib?
- j. Xoolahee baa ina siiya saamo?
- x. Xayawaankee baa inoo ilaaliya guryaheenna?
- kh. Xayawaankee baa mararka qaarkood khatar ah?
- d. Xayawaankee baad jeceshahay?


saán -ta, pl. saamó *skin, hide | skinn, djurhud*

már -ka, pl. marár *time, occasion | gång*

17.3 Sahra waxa ay tagaysaa dugsiga



- Subax wanaagsan, Sahra.
- Subax wanaagsan, Faadumo.



- Subax wanaagsan, arday.
- Subax wanaagsan, bare.


báre -ha *teacher* | *lärare*



Kani waa dugsiga Sahra.

Ma weyna.

má wéyna < ma *weyn+aha (*it*) is
not big | (*den*) är inte stor



Sahra fasalka ayay galaysaa.


- Aaway saaxiibadday?

aaway? *where is?* var är?




Kani waa macallinkii Sahra.

- Maxaa aan qoray?



Sahra waa ay akhriyaysaa.

- Waa aan jeclahay akhriska.



Kani waa macallinkii Sahra.




Sahra fasalka ayay galaysaa.



- Maxaa aan qoray?



Ardaydu waa ay dheelayaan.
Dhakhso.
Sahra aad bay u ordaysaa.




Ardaydu waxa ay u wada
shaqaynayaan laba-laba.
- Ma fahantay?
- Haa.

laba-laba *in pairs* | *två och två*

fahmaa, fahantaa *understands* |
förstår

17.4




Bood, bood, bood.
Xarigga ha taaban.


xárig / xádhig -ga rope | rep
ha don't | låt bli att
taabtaa, taabataa touches | vidrör,
tar på (ngt)



Fiiri, fiiri, fiiri shimbirtan.
Waa ay nooshahay.



Walaal, fiiri shimbirtayda.
Xaggee baan dhigaa?



Ardaydu waa ay heesayaan.
Maxaa ay ku heesayaan?
Heesta Calanka.



Axmed waxa uu salaamayaa
macallinka.

- Nabad, macallin.



Axmed wuu kaalmaynayaa.
Waxa uu soo qaadayaa tabaashiir.

kaalmeeyaa supports, assists, helps
| hjälper, stöttar
qaadaa, qaaddaa takes | tar
tabaashiír -ta chalk | krita



Axmed wuu qorayaa.
Waxa uu qorayaa eray.
- Waa aan jeclahay qorista.




Axmed wuu sawirayaa.
- Waxa aan sawirayaa guri.

17.5



Ardaydu wax bay jilayaan.
Wiilka jiifaa wuu bucaa.


jilaa, jishaa plays (theatre),
pretends | spelar (teater), låtsas
jiifaa, jiiftaa lies down, stretches out
| ligger, sträcker ut sig
bukaa, bugtaa is ill | är sjuk



Waa aan gajjoonayaa.
Rooti baan rabaa.




Axmed wuu tartamayaa.
Orod, orod, orod.



Fiiriya caleemaha.
Ma isku egyihii?

caleén -ta, pl. caleemó leaf | blad,
löv



Axmed guriga ayuu u socdaa.
Waxa uu la socdaa saaxiibkiis.



Axmed waxa uu goosanayaa liin.
Waa aan jeclahay liinta.



Axmed waxa uu sameynayaa doon.
Kaalaya aan ku dheelnee.



Axmed waxa uu haystaa baabuur.
Isaga ayaa sameeyay.

goostaa, goosataa cuts off, picks
(fruit) | skär loss, plockar (fukt)

doón -ta boat | båt
kaálay!, pl. **kaaláya!** come! | kom!
aan dheelno let's play | låt oss
leka, nu leker vi
dheelnee < ***dHEELNO+EE**
ee so, then | så

17.6



Ardaydu waa ay tagayaan.
Xaggee ayay tagayaan?



Sahra waa ay ciyaaraysaa.
Ardaydu waa ay sacabinayaan.

sacabiya *applauds | applåderar*




Sahra waxa ay daawanaysaa dheel.
Maxaa la dheelayaa?
Kubbadda cagta.

daawadaa, daawataa *watches |
tittar*
dHEEL -ka/-sha *play, game | lek*



Sahra waa ay sheekeynaysaa.
Ardaydu waa ay dhegeysanayaan.

sheekeeyaa *tells (a story) |
berättar*




Waa aad salaaman tiiin
dhammaantiin.
Ku soo dhawaada dugsiga.

salaamán (adj.) greeted | hälsad
tiiin you are (pl.) | ni är



Axmed oo abaalgud qaadanaya.
Wuu faraxsan yahay.

abaal-gud -ka reward | belöning



- Hambalyo!
- Mahadsanid!
- Maxaa lagu siiyay?
- Buug iyo qalin.

hambályo -da congratulations
gratulation
mahadsánid < *mahadsan+tihid
thank you! | tack ska du ha!
lagu < *la+ku one + you | man +
dig



Carruurtaydu aad bay u fiican tahay.
Sahrana abaalgud bay heshay.

17.7




Sahra waxa ay sameyn kartaa
waxyaabo badan.
Waxa ay quudinaysaa digaagga.
Waxa ay u daadinaysaa galley.



Cali waxa uu hayaa digaagad.
Waxa uu hayaa digaagad yar.
Cali, iska dhaaf, iska dhaaf.

hayaa, haysaa holds, has | håller,
har


iská dhaafaa, dhaftaa leaves
alone | lämnar i fred



Axmed lo' buu waraabinayaa.
Waxa uu ka keenay meel fog.
Waa uu daallan yahay.



Safiya waxa ay siddaa biyo.
Aamina waxa ay la socotaa Safiya.
Waxa ay tagayaan guriga.



Cumar waxa uu soo ciyaarayaa
kubbadda cagta.
Kubbadda cagta ayuu jecel yahay.
Waa ciyaartooy fiican.



Kuwani waa waalidkii carruurta.
Hooyadu unto ayay karinaysaa.
Aabhuu beerta ayuu falayaa.

17.8



Sahra waxa ay la ciyaaraysaa Farxiya.

Sahra waxa ay tiri.

"Ma jecli dheeshan.

Waxaan rabaa dhuumaalaysi.

Kaalay aan saaxiibadeen raadinnee."

má jecli < ma *jecel+ahi *I don't like* | jag tycker inte om
dhuumaaláysi -ga *hide-and-seek* | kurragömma



Farxiya waxa ay tiri,

"Waa kuwan Xaawa iyo Faadumo.

Kaalay aan u yeedhnee.

Faadumo, Xaawa, kaalaya!

Aan ciyaarno dhuumaalaysi."




Faadumo waxay tiri,
 "Waxaan rabaa xarig-ka-bood."
 Sahra ayaa tiri,
 "Maya, taasi ma fiicna.
 Dhuumaalaysiga ayaa ka fiican."
 "Waa yahay, ina keena."

wáá yahay okay | okej
 ina keéna (imp. pl.) let's go! | lät
 oss gå, nu går vi



Gabdhuwu waxa ay dheelayaan
 dhuumaalaysi.
 Sahra indhaha ayay isku qabanaysaa.
 "Ma tihiin diyaar?"
 "Maya, welí ma nihin."

qabtaa, qabataa takes, seizes, holds
 | tar, griper, håller
iskú qabtaa closes (holds together)
 | stänger (håller ihop)
diyáar -ka readiness; sth that is
 ready | beredskap; ngt som är
 redo, beredd
welí -ga still, ever | än, ännu,
 fortfarande
má nihin we are not | vi är inte



Sahra iyo Axmed waxay tagayaan
dugsiga.

Waxay la socdaan saaxiibkood
Bashiir.

Aad uma soconayaan, waayo Bashiir
baa naafso ah.


aad + u *much, fast*

umá < *u+ma

má *not*

naáfo -da *handicapped person*

handikappad person



Macallinku wuxuu sawiray wiil iyo
gabar.

Wuxu yiri,

"Yaa qori kara magacyadooda?"

Bashiir wuxuu qorayaa magacyo.

Sahra waxay akhriyaysaa magacyo.

mágac -a, pl. magacyó *name |
namn*



Waa waqtigii nasashada.


nasásho -da pause, break rast, paus,
vila

Wiilashu waxay ciyaarayaan kubbadda
cagta.

Bashiir wuxuu ciyaarayaa kubbadda
cagta.

Si fiican buu u ciyaarayaa.

17.10



Axmed iyo saaxiibkii waxay haystaan
xarig.

saaxiibkii = saaxiibkiis

Geedka ayay ku xireen.


xiraa, xirtaa / xidhaa, xidhaa ties
| binder, knyter

Axmed wuu leexaysanayaa.

leexaystaa, leexaysataa swings,
plays on a swing | gungar

Saaxiibkii baa ku lulaya.

kú lulaa, lushaa makes something
swing | sätter i gungning



Xariggu ma adka.
Wuu kala go'ay.
Axmed wuu soo dhacay.
Saaxiibkiina wuu naxay.

má ádka < ma *adag+aha is not
strong, hard | är inte stark, hård
go'aa, go'daa sth breaks | ngt går
av
naxaa, naxdaa becomes frightened,
shocked | blir chockad, blir rädd,
får panik



Axmed wuu xanuunsaday.
Lugta ayuu ka dhaawacmay.
Wuu dhutinayaa.
Saaxiibkii baa taageeraya.

xanuunsadaa, xanuunsataa is ill,
is in pain | mår dåligt, får/har
ont

dhutiyyaa, dhutisaa limps | halar
taageeraa supports | stöttar, stöder



Safiya waxa ay ururinaysaa xaabo.
Waxay heshay xaabo badan.
Way faraxsan tahay.
Hadda, dab ayay shidi kartaa.

ururiyaa, ururisaa gathers, collects
| samlar (ihop)
xaábo -da firewood | ved

shidaa, shiddaa lightens, ignites,
sets on fire | tänder (eld på) ngt



Safiya waxay u socotaa guriga.
Waxay siddaa xaabo.
Waxay aragtaa dawaco iyo riyo.
Dawacadu waxay eryanaysaa riyaha.

dawáco -da jackal; fox | schakal;
räv
rí', rída, pl. **riyó** goat | get
eryadaa, eryataa chases | jagar



Safiya waxay shidaysaa dab.
Hooyadeed galley ayay haadinaysaa.
Safiya waxay u sheekaynaysaa
hooyadeed.
Waxay u sheegaysaa dawacadii iyo
riyihii.

haadiyaa, haadisaa winnows,
blows off, makes something fly |
rensar, blåser bort, får något att
flyga

Jannaayo
Febraayo
Maarso
Abriil
Maajo
Juun
Luulyo
Agoosto
Sebteembar
Oktoobar
Nofeembar
Diseembar

Waxa la yidhaahdaa Caasha.
Magaceedu waa Caasha.



Waa maxay magacaagu?

Dhammaan magacyadu waxay ka
bilaabmaan xarfo waaweyn.
Qor saddex wiil iyo saddex gabdhood
magacyadooda.


bilaabmaa, bilaabantaa *sth begins*
| *ngt börjar*

Magacyada maalmuhu waxay ku
bilaabmaan xarfo waaweyn.
Qor magacyada saddex maalmood.

Magacyada biluhu waxay ku
bilaabmaan xarfo waaweyn.
Qor magacyada saddex bilood.

bíl -sha *month; crescent moon* |
månad; månskära

Waxa jira erayo badan.
 "Adiga" waa eray.
 "Ma" waa eray.
 "Dugsiga" waa eray.



Qor erayo badan.

Haddii aad erayo isku darto waxa aad
 heli doontaa weer.
 Laakiin, waa in aad erayada u dhigtaa
 sida ay iskugu xigaan.



Tee baa weer ah?

- b. Dheelayaan gabdhuhu way.
- t. Gabdhuhu way dheelayaan.

Weertu waxay ka bilaabantaa xaraf
 weyn. Badanaaba waxay ku
 dhammaataa joogsi.

iskú *daraa, dartaa* adds together |
 sätter ihop
weédh -a / *weér* -ta sentence;
 (ling.) clause | mening; (ling.)
 sats
iskugú < *is+ú+kú (is + ku with
 each other, **sida** + u the manner
 in which)
iskú xigaa is connected (with each
 other) | hänger ihop (med
 varandra)

tee? which (one)? | vilken?

Qor weero.

badánaa often | ofta
-ba also | också, även

Af Soomaali, Buugga 2aad (Muqdisho 1994: xx–xx)

Wadahadallo 52–53

52.0

- Bishani waa tuma?
- Bishani waa Nofeembar.

52.1

- Naayaa Caasha, maxaad sheegtay?
- Nabad weeye. Adigu iska warran.
- Waa nabad. Ma Muqdishaad ka timid?
- Maya. Waxaan ka imid Baraawe.
- Hadmaad ka timid?
- Waxaan ka imid Nofeembar.
- Aabbahaan ma Baraawuu deggan yahay?
- Haahey.

naayaa *hey!* (respectless way of getting a womans attention) | **hördū!** (respektlöst sätt att tilltala en kvinna)

52.2

- See tahay?
- Nabad.
- Bishani waa tuma? Ma Abriil baa?
- Maya. Abriil ma aha. Waa Maarj.
- Ma Juun baad tagaysaa Hargeysa?
- Maya. Ogost baan tagayaa Burco.
- Inantaasi ma walaashaa baa?
- Haa. Waxay ka timid Muqdisho.
- Magaceed?
- Caasha. Caasha, kani waa Yuusuf.
- Barasho wanaagsan.
- Barasho wanaagsan.
- Ma reer Muqdishaad tahay?
- Haa, laakiin immika waxaan deggan ahay Boorame.
- Ma jeceshahay?
- Haa.
- Walaalkaa ma Booramuu ku nool yahay?
- Maya. Muqdishuu ka shaqeeyaa.

- Muxuu qabtaa?
- Waa macallin.

53.0

- Taariikhdu maanta waa immisa?
- Taariikhdu maanta waa shan iyo labaatankii Julay.

53.1

- Waryaa Cali! Taariikhdu maanta waa immisa?
- Maanta waa saddexdii Ogost taariikhdu.
- Ma maantaad tagaysaa Boorame?
- Maya. Waxaan tagaya bisha sagaalkeeda.
- Ma waxaad deggan tahay Boorame?
- Haa. Laakiin waxaan jeclahay Hargeysa.
- Ma Booramaad ku dhalatay?
- Maya, waxaan ku dhashay Baraawe.

Beginning in Somali (1966: 145–149)

Cutubka 18aad

18.1 Caqli Badane

Waxa aan dhegeysanayaa sheekadaan, kana jawaabayaa weydiimaha ka dambeeya.

Xasan waxa uu ahaa wiil aad u jecel mooska. Subax kasta waxa uu iskoolka u qaadan jiray moos. Maalin maalmaha ka mid ah isaga oo u socda iskoolka, oo moos gacanta ku sita ayaa daanyeer ka hor yimid. Daanyeerkii waxa uu damcay in uu mooska ka qaato Xasan. Markaas ayuu gadaal ka soo maray. Xasan waxa uu dareemay waxa gadaashiisa socda, waxa uuna fiirihey gadaal. Daanyeerkii ayaa ku soo boodey oo Xasan ka dafay mooskii. Xasan aad ayuu uga xumaaday.

Maalintii labaad Xasan mooskii waxa uu gashaday boorsada, si uu mooska uga qariyo daanyeerka, hase ahaatee daanyeerkii waxa uu arkay mooskii oo ku jira boorsada, wuuna ku soo booday, waana ka dafay.

Xasan maalintii ku xigtay waxa uu ku fekerey sidii mooska uu uga ceshan lahaa daanyeerkii.

Maalintii saddexaad Xasan mooskii ayuu soo cunay, inta uusan guriga ka soo bixin, waxa uuna gacanta ku soo qaataq qobkii mooska, waxa uuna ku fekerey in uu xal u helo dhibaatada haysata.

Daanyeerkii waxa uu ka dafay Xasan qobkii mooska, wuuna cunay. Xasan aad ayuu u xanaaqay markii uu arkay daanyeerkii oo cunaya qobkii mooska.

Maalintii afraad Xasan aad ayuu u fekerey, si uu u gaaro xal kama dambays ah. Subixii dambe Xasan inta uusan guriga ka soo bixin ayuu mooskii soo mariyey basbaas, wuuna soo qaataq. Daanyeerkii ayaa dafay mooskii basbaaska lahaa, wuuna ku gubtay. Xasan aad ayuu ugu qoslay markii uu arkay daanyeerkii oo carrabkiisu baannaanka yaallo oo boodboodaya, kana cararay mooskii.

Subaxii dambe Xasan waxa uu ku soo qaataq gacanta moos, waxa uuna soo ag maray daanyeerkii.

Daanyeerkii kama uu dafin Xasan mooskii maalin dambe.

Weydiimo

1. Xasan maxaa uu aad u jeclaa? jeclaa < *jecel+ahaa
 2. Markii uu iskoolka u socdey ee daanyeerku ka daba yimid maxaa uu gacanta ku haystey?
 3. Xasan maxaa laga dafay?
 4. Maalintii labaad xaggee ayuu mooska ku qarsaday?
 5. Xasan maxaa uu daanyeerka ku sameeyey ugu dambayntii?
 6. Maxaa ay tahay dulucda sheekadu?

Af Soomaali 1, Muqdisho 2018: 70–71

18.2 Hawo

Buuggaaga ku marawaxadi wejigaaga.
Maxaad wejigaaga ka dareentay?
Ma dareentay in ay hawo kaa martay
wnejiga?
Ma arki kartaa hawada?
Xaggee bay hawadu ka timmaaddaa?

Jiritaanka hawada

Ma arki karno hawada.
Ma urin karno hawada.
Waxa aynu arki karnaa waxa ay
hawadu ka samayso hareeraheenna.

Hawadu walxaha ayaa ay dhaqaajisaa




Maxaa si dhaqso ah u dhaqaajiya
doonta biyaha dushooda?



Maxaa ruxaya laamaha dhirta?



Maxaa qashinka dhaqaajinaya?



Maxaa ruxaya calanka?



Hawadu ma qaadi kartaa carro?

Dabaysha xoogga badan ayaa
qaadi karta carrada.

Hawadu waxa ay joogtaa meel kasta.
Hawadu walxaha ayaa ay dhaqaajisaa.
Hawada socota waxa la yiraahdaa
dabayl.

dabaýl -sha *wind* | *vind, blåst*

Hawo ku ciyaarid

Afuuf buufin^s / biibiile^N.
Maxaa ku dhacay
buufinka^s / biibiilaha^N?
Maxaa wayneeyay
buufinka^s / biibiilaha^N?
Xaggee bay hawadani ka timid?
Maxaa dhacaya marka aad joojiso
afuufidda buufinka^s / biibiilaha^N?



Kubbad



Weligaa ma ciyaartay kubbad?
Maxaa ka buuxa kubbadda?
Ma waxa ka buuxa hawo?
Kubbaddu waa ay adkaataa marka la
neefeyyo.

Waxa kale oo ay yeelataa qaab
wareeg ah.

Layli

Sheeg run ama been.
Waa aynu arki karnaa hawada.
Waa aynu taaban karnaa hawada.
Hawadu walxaha waa ay dhaqaajisaa.

Saynis 1, Muqdisho & Hargeysa 2001: 79–83

Wadahadallo 52–53

53.2

- Anigu maanta Burcaan tagayaa.
- Waa immisa taariikhdu maanta?
- Taariikhdu waa Julay siddeed iyo labaatankeedii maanta.
- Aniguna Sebteembar baan tagayaa Muqdisho.
- Aabbahaan ma Muqdishuu deggan yahay?
- Haa. Hooyadayna Muqdishay ku nooshahay.
- Ma Muqdishay ku dhalatay?
- Haa.
- Immisa carruuraa walaalo tihii? carruuraa = carruur ah baa
- Wawaannu walaalo nahay afar inan iyo inan.

53.3

- Muusoow! Muqdisho xaggay ka xigtaa Baraawe? Ma galbeed bay ka xigtaa mise bari?
- Waxay ka xigtaa waqooyi.
- Ma Baraawaad ku dhalatay?
- Haa. Laakiin waxaan ku nool ahay Muqdisho.
- Anigu Muqdishaan tagayaa.
- Hadma?
- Maanta waa immisa taariikhdu?
- Taariikhdu waa kowdii Nofeembar.
- Bishan toddoba iyo tobankeedaan tagayaa.

54.0

- Goormaad dhalatay?
- Wawaan dhashay kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo aftankii.

54.1

- Nuuroow! Immisa jir baa tahay?
- Wuxaan dhashay kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo soddonkii. Wuxaan ahay sagaal iyo labaatan jir.
- Bisheed dhalatay?
- Wuxaan dhashay Oktoobar. Adigu goormaad dhalatay?
- Anigu waxaan dhashay kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo afartankii.
- Ma Hargeysaad ku dhalatay?
- Maya, Berberaan ku dhashay.
- Berbera Burco xaggay ka xigtaa?
- Waxay ka xigtaa bari.

54.2

- Waryaa Xamiid! Ma reer Burcaad tahay?
- Maya. Wuxaan ahay reer Muqdisho.
- Ma Muqdishaad ku dhalatay?
- Haa.
- Goorma?
- Kun iyo sagaal boqol iyo siddeed iyo soddonkii.
- Imminka ma Muqdishaad deggan tahay?
- Haa. Wuxaan deggan ahay Muqdisho.
- Maxaad qabataa?
- Arday baan ahay, laakiin imminka karraaniyaan ahay.
- Muqdisho miyay ka fog tahay Hargeysa?
- Haa. Shan boqol oo mayl bay u jirtaa.
- Aabbahaa ma Hargeysuu ku nool yahay?
- Maya. Muqdishuu deggan yahay.

karraaniyaan = karraani baan

Beginning in Somali (1966: 150–153)

Cutubka 19aad – Erayo

insháá' Alláah	<i>om Gud vill</i>
annága	<i>vi</i> (exkluderande)
baakád (f.)	<i>paket</i>
Baaríis	<i>Paris</i>
báraf (m.) (Persian: <i>barf</i>)	<i>is, snö</i>
bariis (m.) (möjl. fr. pers. <i>berenj</i>)	<i>ris</i>
PhD (f.) [bií eyj díil]	<i>fil. dr., doktorsexamen</i>
boodboodaahoppar	<i>upp och ner</i> (flera gånger)
buufín (m.)	<i>ballong</i>
carfaa, caraftaa	<i>luktar gott, doftar</i>
ciyáal (m. koll.)	<i>barn</i>
damiyaa, damisaa	<i>släcker</i>
degdegsán yahay	<i>har bråttom, är stressad</i>
deggán	<i>bosatt</i>
dhalásho -da	<i>birth födelse</i>
dhammaystaa	<i>avslutar (til sin egen fördel)</i>
oo dhán	<i>alla, hela</i>
dhashay, dhalatay	<i>föddes</i>
dhigaa, dhigtaa,	
prog. dhígayaa,	
inf. dhígi, imp. dhíg	<i>undervisar</i>
dhínac	<i>sida</i>
doktóor (m.)	<i>doktorsexamen</i>
fádhí (m.)	<i>soffa</i>
fara badán	<i>väldigt mycket</i>
gaadhaa ^N , gaadhaa ^N [dhdh]	
/ gaaraa ^S , gaartaas ^S	<i>kommer fram</i>
garaacaa	<i>, garaacdaa</i> <i>knackar</i>
gúde	<i>insida</i>
háddaan	< <i>hadda + baa + aan</i> <i>nu ... jag</i>
hadiyád (f.) (fr. arab.)	<i>gåva, present</i>
idinlá < idin + lá	<i>er ... med</i>
imid	<i>jag kom</i>
Ingiríiska	<i>England</i>
Itóobiya (f.)	<i>Etiopien</i>
jaamacád (f.) (fr. arab.)	<i>universitet</i>
jecéshahay < jecel + tahay	<i>du, hon gillar, är förtjust i ngt</i>
jeclahay < jecel + ahay	<i>jag gillar, är förtjust i ngt</i>
jeclaán < jecel + ahaan (inf.)	<i>gilla, vara förtjust i ngt</i>
kéeg (m.) (fr. eng. <i>cake</i>)	<i>mjuk kaka, tårta, muffins</i>
Kénya (f.)	<i>Kenya</i>
koowaád (adj.)	<i>första</i>
lá kulmaa, kulantaa	<i>träffar ngn</i>
kún	<i>tusen</i>
lahaa, lahayd (hjälpverb)	<i>skulle</i>
luuqád (f.) (fr. arab.)	<i>språk</i>
Maraýkanka (m.)	<i>Amerika</i>

márba dhínac *än åt ena, än åt andra sidan*
múddo (f.) (fr. arab.) *period*
mustáqbal (m.) (fr. arab.) *framtid*
nabadéey! *hej då!*
nabadgéyo! *hej då!*
naxariís -ta kindness | *snällhet, vänlighet*
noqdaa, noqotaa becomes | *blir*
odaý -ga *gammal man, gubbe*
qabsásho -da *fångande*
qarxaa *exploderar*
qófmuu < qof + ma + uu *vem ... han ?*
qoobkaciyyáar -ka dance | *dans*
qurxiyaa, qurxisaa *dekorerar, smyckar, gör vacker*
raashín -ka *livsmedel, kost, mat*
sánnad -ka (Ar.) year | *år*
shámac -a (Ar.) candle | *stearinljus*
Soomaalí -da (coll.) Somlais | *somalier*
Soomáali -ga Somali | *somalier*
Soomáaliya *Somalia*
tólow (interj.) uttrycker undran
udgoón (m.) *väldoft*
wáddan -ka (Ar.), pl. waddamó country | *land*
wáqti/wákhti -ga (Ar.) time | *tid*
wárran!, pl. warráma tell! | *berätta!*
iská wárran! *How do you do!*
wéeye < waa + yahay
xaflád -da (Ar.) party | *fest, kalas*
xiisó *intresse*
xiisó badan *intressant*
xoolodhaqáto -da (coll.) *boskapsuppfödare*

19.1 Saddexdii geed

Beri waxa jiray saddex geed. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa ay ka sheekaysteen mid waliba waxa uu jecel yahay. Kii koowaad waxa uu yidhi "Waxa aan noqon ama la iga samayn sanduuq lagu rito lacagta." Kii labaadna waxa uu yidhi "Waxa la iga samayn markab oo waxa aan qaadi boqorrada adduunka." Kii saddexaadna waxa uu yidhi "Waxa aan noqon geedka ugu dheer adduunka."

19.2 Saciid Aadan

Maalin wanaagsan!

Aniga magacyga waxaa la yiraahdaa
Saciid Aadan.

Iska warrama!

Waxaan faraxsan ahay in aan idinla
kulmo.

Anigu waxaan ka imid Muqdisho,
Soomaaliya.

Anigu waxaan dhigaa afka Soomaaliga
Jaamacadda Harvard

Afkayga koowaad ee aan ku hadlo ee
hooyo waa afka Soomaaliga.

Anigu waxaan ku hadlaa luuqadaha
afka Soomaaliga, afka Ingiriiska iyo
afka Carabiga.

Anigu waxaan ku **noolaa** waddamada
Soomaaliya, Yemen iyo Maraykanka.
Anigu waxaan booqday waddamo
badan.

Waxaan booqday waddamada
Itoobiya, Keenya, Sacuudi Carabiya,
Dubaay, Kosta Rika, Kolombiya...

waddamo fara badan... Baariis,
London...

Anigu waxaan dhashay Nofeembar
nayn nayntiin sevendi.

Aabbahay wuxuu ahaa xoolodhaqato.

Hooyaday waxay ahayd xoolodhaqato.

Anigu waxaan leeyahay kow iyo toban
walaalo ah oo wiilal ah iyo toban
gabdho ah.

Anigu waxaan leeyahay xaas iyo
carruur.

Xaaskayga magaceeda waxaa la
yiraahdaa Luul.

Carruurtayda waxaa la yiraahdaa...
waa afar: Maxamuud, Ahmed, Muna
an Muniira.

Anigu waxaan deggan ahay Procton,
Massachusetts.

Anigu waxaan imid Massachusetts
nayntiin nayndi eyt ama kun iyo sagaal
boqol iyo siddeetan... aa... sagaashan
iyo siddeedii.

Anigu waxaan wax ka dhigayay afka
Soomaaliga Jaamacadda Harvard
muddo laba sano ah.

Anigu waxaan jeclahay raashinka...
bariis iyo hilib ari

Anigu waxaan jeclahay xayawaanka...
aan jecel ahay xayawaannada ugu
jecel ahay... waa geela. Soomaalida oo
dhan way jeceshahay geela.

Anigu waxaan jeclaan lahaa
mustaqbalka waxaan ahay arday barta
PhD-da (bii-eyj-dii-da) ama doktoorka
sameynaya.

Diriimkayguna waxaa weeye in maalin
maalmaha ka mid ah aan
dhammaysto... inshaa' Allaah sannadka
soo socda.

Maalin wanaagsan. Nabadgelyo.

<https://alp.fas.harvard.edu/somali>

19.3 Ciiddii Biino

Kani waa Biino.

Maanta waa ciid.

Baakeed qurux badan ayuu
sameynayaa Biino.

Biino wuxuu samaynayaa buskud.

Udgoonkiisa ayaa soo carfaya.

Albaabka ayaa la garaacay

Qofmuu noqon kartaa?

Waa Biinfinka iyo Biinoliina.

Kulligood waxay qurxinayaan geedka
ciidda.

Qoobkaciyaar ayay bilaabeen.

Hadda toontihii ayaa yimi.

Ma joogaan ciyaal naxariis badan?

Haa, annaga waan naxariis badan
nahay.

Oo! ... Oo! ... Uu! ... Hi hi!

Hadiyadahani aad bay u fiican yihiin.

Biino waxaa la siiyay ciyaar.

Waana wuxuu rabay.

Toontuhu wuu degdegsan yahay.

Nabadeey, toonte!

Eega! Waxay sameeyeen oday baraf ah.

Alla, **fiicanaa!** Haddaan gudaha soo galnay mar kale.

álla! *oh, my goodness!* | *oj,*
herregud!

Mm! Cuntaduna **macaanaa**.

Ciid xiiso badan ayay ahayd.

Nabadgelyo!

Författare: Agneta Norelid & Eva Pils

Illustratör: Kenneth Andersson

Berättarröst: Miriam Hersi

<http://urskola.se/Produkter/171172>

Dhalashadii Biino

Kani waa Biino.

Maanta waa dhalashadii Biino.

Oy! Buufinkii wuu qarxay.

Biino wuxuu sameeyay keeg.

Albaabka ayaa la garaacay.

Qofmuu noqon kartaa?

Waa Biinfiinka iyo Biinoliina.

Tolow, maxaa ku jira baakeedka?

Waa biinfiin yar oo qurux badan.

Biino shamacyadii oo dhan ayuu
daminayaa.

Biinoliina, Biino iyo Biinfiinka keeg
ayay cunayaan.

Biinoliina iyo Biinfiinkii waxay u
heesayaan Biino.

Qoobkaciyaar ayay ciyaarayaan
kulligood.

Marba dhinac ayay u ordayaan.

Fadhiga dushiisa ayay ku
boodboodayaan.

Hurra! Hadda waa kalluun qabsasho.

Xafladdii way dhammaatay.

Waqtigii guriga la aadi lahaa ayey
gaadhey.

Nabadgelyo!

Författare: Agneta Norelid & Eva Pils

Illustratör: Kenneth Andersson

Berättarröst: Miriam Hersi

<http://urskola.se/Produkter/171170>

Welcome to continue with

[Beginner's Somali Reader, Part 3](#)

[Beginner's Somali Workbook, Part 3](#)